Edina Public Schools
DEFINING EXCELLENCE

# Buug-gacmeedka Ardayga iyo Qoyska ee 2026-27

Dugsiyada Dhexe



# Tusmada


Tusmada 2
Soo Dhaweyn Ka Socota Kormeeraha Guud 5
Qaabka Buug-gacmeedka 6
**Qaybta 1: Macluumaad Guud 6**
Hadafka Dugsiyada Dadweynaha ee Edina 6
Hiigsiga Dugsiyada Dadweynaha ee Edina 6
Macluumaadka Siyaasadda 6
Macluumaadka Dugsiyada Dhexe 7
South View Middle School 7
Valley View Middle School 7
Nidaamka Gudbinta Warbixin Qarsoodi ah – Wax Dheh 7
Saacadaha Imaanshaha iyo Dareerista 7
Faahfaahinta Soo Xaadiritaanka 8
Soo Daahitaanada 8
Sii-deynta Goorhore 8
Soo Sheeg Maqnaansho 8
Faahfaahinta Ku Aadan Maqnaanshiyaasha Cudur-daarka Leh/Lahayn 8
Macluumaadka Kalandarka 9
Kalandarka Degmada 9
Kalandarada Dugsiyada Dhexe 10
Cabashooyinka 10
Gudbinta Faallooyinka ama Walaacyada 10
Maalmaha Waxbarashada Onlaynka ah 11
Hubinada Sooyaalka Taariikhda Shaqada 11
Helitaanka Loo Siman Yahay ee Tas-hiilaadka Dugsiga 11
Khidmadaha 12
Ururinta Lacagaha 13
Hadiyadaha Shaqaalaha 13
Dabaaldagyada Ciidda iyo Xafladaha 13
Wareysiyada Ardayda ee ay Sameynayaan Hay'ado Dibedda ah 13
Qorshaha Helitaanka Luuqadda 13
Maktabadda iyo Xarunta Warbaahinta 14
Qadada iyo Quraacda 14
Farriimo Ku Socda Ardayda iyo Qoysaska 15
Furashada helitaanka farriimaha qoraalka ah ee ka socda Dugsiyada Dadweynaha ee Edina 15
Takoor La'aanta 15
Ogeysiinta Habdhaqanka Rabshadda leh ee Ardayda 16
Shirarka Macalimiinta Waalidka 16
Habeenka Manhajka 16
Shirarka La-talinta 16
Shirarka Soo Jireenka ah 16
Shirarka uu Hoggaamiyo Ardayga 17
Isxilqaamayaasha Waalidka 17
Ballan-qaadka Daacadnimada 17

Hawlaha Dugsiga 17
Habraacyada Xiritaanka Dugsiga 18
Saraakiisha Kheyraadka Dugsiga 18
Baaritaanada 19
Lookooyinka iyo Alaabta Gaarka ah ee Ku Jirta Lookada 19
Miisaska 19
Alaabta Gaarka Loo Leeyahay iyo Jirka Ardayga 19
Aqoonsiyada Ardayda 20
Daabacaadaha iyo Agabka Ardayga 20
Boorarka iyo Calaamadaha 20
Diiwaanada Ardayga 20
Ra'yi Ururinada Ardayga 20
Gaadiidka Ardayda ee Dugsiyada Dadweynaha 20
Kheyraadka Tignoolajiyadda ee Ardayda/Qoysaska 21
Portal-ka (Bogga Waalidka/Bogga LaunchPad) 21
Infinite Campus 21
Schoology 21
Safarka 22
Duubista Muuqaalka iyo Maqalka 22
**Qaybta 2: Macluumaadka Tacliinta** **22**
Qishka iyo Koobiyaynta Hawlaha Dadka Kale 22
Fursadaha Sanad Dugsiyeedka La Dheereeyay 23
Safarrada Aqoon Kororsiga 23
Buundooyinka/Buundo-siinta 23
Dhaqamada Buundo-siinta/Qiimaynta 23
Shaqada Guriga 24
Diidmada Waalidka/Masuulka ee Imtixaanaadka Gobolka oo Dhan ah 24
Gudbidda iyo Ku Celinta 24
Dugsiga Xagaaga iyo Kobcinta Xagaaga 24
Xaqa Waalidku u Leeyahay inuu Ogaado 25
**Qaybta 3: Xeerarka iyo Edbinta** **25**
Soo Xaadiritaanka 26
Mamnuucista Xoog Sheegashada 26
Basaska - Dhaqanka Basaska Dugsiga Dushooda iyo Cawaaqibta Ka Dhalan Karta Dhaqan-Xumada 27
Taleefanka Gacanta iyo Aaladaha Kale ee Elektaroonigga ah ee Shakhsiyeed 28
Laga Maqan Yahay Maalinta 28
Anshaxa 29
Lebiska iyo Muuqaalka 29
Dugsi iyo Goob Shaqo oo Ka Caagan Daroogada 29
Mamnuucista Dhibaateynta iyo Rabshadda 30
Mamnuucista Dullaysiga 30
Adeegsiga La Oggol Yahay ee Intarneedka 30
Lookooyinka 31
Isticmaalka Tignoolajiyadda 31
Dugsiyo Ka Caagan Tubaakada 31
Kharribaadda/Waxyeellaynta Hantida 32

Mamnuucista Hubka 32
**Qaybta 4: Caafimaadka iyo Badbaadada** **32**
Shilalka 32
Qorshaha Maareynta Asbestos-ka 33
Maareynta Xasaradda 33
Xogta Xiriirka Xaaladaha Degdegga ah 33
Macluumaadka Caafimaadka 33
Gargaarka Koowaad 33
Cudurada La isu Gudbiyo 33
Adeegyada Caafimaadka 34
Tallaalada 34
Daawooyinka inta Lagu Jiro Maalinta Dugsiga 34
Macdanta Rasaasta (Lead) ee Ku Jirta Biyaha La Cabbo ee Dugsiga 35
Ogeysiiska Adeegsiga Sunta Cayayaanka 35
Macluumaadka Ka-hortagga is-dilka 36
Soo Booqdayaasha 36
**Qaybta 5: Buugga Siyaasadda Degmada (Tusmada Mowduucyada La Xushay)** **36**

> Waxaanu aaminsanahay in wada-shaqeynta xooggan ee ka dhaxaysa qoysaska, shaqaalaha, iyo bulshada ay lagama maarmaan u tahay abuurista khibrado waxbarasho oo macno u leh arday kasta.

## Soo Dhaweyn Ka Socota Kormeeraha Guud

Qoysaska Qaaliga ah ee Dugsiga Dhexe,

Halkan Dugsiyada Dadweynaha ee Edina (EPS), waxaanu aaminsanahay in wada-shaqeynta xooggan ee ka dhaxaysa qoysaska, shaqaalaha, iyo bulshada ay lagama maarmaan u tahay abuurista khibrado waxbarasho oo macno u leh arday kasta. Si wadajir ah, waxaanu kobcin karnaa tacliin heersare ah una diyaarin karnaa ardaydeena inay ku kobcaan bulsho caalami ah oo si joogto ah u horumareysa isla markaana hodan ku ah dhanka dhaqanka.

Deegaan badbaado ah, loo dhan yahay, oo soo dhaweyn leh ayaa aasaas u ah guusha ardayga. Guddiga Dugsiyada Edina wuxuu diyaariyay siyaasado iyo habraacyo dhammeystiran oo qeexaya xuquuqaha iyo masuuliyadaha ardayda si loo bixiyo deegaan waxbarasho oo wanaagsan oo ku dhisan ixtiraam dugsiyadeenna oo dhan.

Buug-gacmeedka Dugsiyada Dhexe ee Edina waa il muhiim u ah qoysaska iyo ardayda. Wuxuu bixinayaa caddeyn ku saabsan siyaasadaha iyo waxyaabaha laga filayo degmada iyo dugsigaba, iyo sida ay u waafaqsan yihiin ballanqaadkeenna wadajirka ah ee ku aaddan fayo-qabka iyo guusha ardayda. Waxaanu ku boorinaynaa dhammaan waalidiinta iyo masuuliyiinta inay buug-gacmeedka la eegaan ardaygooda(ardaydooda). Macallimiintu waxay sidoo kale ku hagi doonaan ardayda waxa ku jira marka uu bilaabmayo sanad dugsiyeedka.

Marki aanu wadajir u shaqayno, waxaanu xaqiijin karnaa in arday kasta la taageero, awood la siiyo, laguna dhiirrigeliyo inuu la soo baxo awooddiisa buuxda oo uu horumar sameeyo. Waad ku mahadsan tihiin wada-shaqeyntiina joogtada ah iyo sida ay idin kaga go'an tahay guusha ardaydiina.

Salaan wacan,



**Dr. Daniel Bittman**
Kormeeraha Guud
Dugsiyada Dadweynaha ee Edina

## Qaabka Buug-gacmeedka

Buug-gacmeedkani wuxuu ka kooban yahay shan qaybood. Mowduucyada ku jira qayb kasta waxaa loo kala saaray xarfaha alifbeetada.

1. Macluumaad Guud
2. Tacliinta
3. Dhaqanka iyo Anshaxa Ardayga
4. Caafimaadka iyo Badbaadada
5. Buugga Siyaasadda Degmada (Tusmada Mowduucyada La Xushay)

---

# Qaybta 1: Macluumaad Guud

## Hadafka Dugsiyada Dadweynaha ee Edina

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waa bulsho waxbarasho oo firfircoon taasoo bixisa waxbarasho heersare ah una diyaarisa ardayda oo dhan inay garowsadaan kartidooda buuxda.

Iyada oo loo marayo tacliin, waxqabadyo, iyo fursado, waxaanu dhiirigelinaa hal-abuur, kobcinaa xiisaha, waxaana horumarinaa xirfadaha hab-u-fikirka qotoda dheer. Waxaanu taageernaa safarka waxbarasho ee arday kasta anagoo abuurayna dhaqan dugsi oo daryeela isla markaana loo dhan yahay oo taageera ardayga idil ahaantiisa.

## Hiigsiga Dugsiyada Dadweynaha ee Edina

Mid kasta iyo arday kasta inay ogaadaan awoodahooda ayna kobcaan.

## Macluumaadka Siyaasadda

Dhammaan siyaasadaha degmada waxaa laga heli karaa Buug-gacmeedka Siyaasadda Degmada. Marka laga yimaado siyaasadaha ku jira iyo/ama lagu tilmaamay buug-gacmeedkan, ardayda waxaa laga filayaa inay ka warqabaan ayna u hoggaansamaan dhammaan siyaasadaha degmada. Ardaydu waa inay fiiro gaar ah u yeeshaan siyaasadaha ku jira Qaybta 500, taas oo si gaar ah u khuseysa ardayda. Su'aalaha ku aadan siyaasadaha waxaa lagu hagaajin karaa maamulaha dhismahaaga.

Siyaasadda degmada ee hadda waxaa laga yaabaa in wax laga beddelo sanad dugsiyeedka oo dhan. Haddii luqadda buug-gacmeedkan ku qoran wakhti ay noqotaba ay ka hor imaanayso siyaasadaha rasmiga ah ee guddiga dugsigu ansixiyay, khilaaf kasta oo noocaas ah waxaa lagu xallin doonaa si waafaqsan luuqadda siyaasadda sida ugu dambayntii loo ansixiyay. Shuruudaha siyaasadda waxaa sidoo kale xukuma shuruudaha qaanuunka ee dhaqangalka ah wakhtiga ay khuseyso. Macluumaadka Dugsiyada Dhexe

## Macluumaadka Dugsiyada Dhexe

### South View Middle School

**Maamulaha:** Tricia Pettis
**Kaaliyaha Maamulaha:** Tami Jo Cook
**Hormuudka Maamulka:** Sarah Miziorko

**Ciwaanka:** 4725 South View Lane
**Saacadaha Dugsiga:** 9:20 a.m.–4:05 p.m.

**Xafiiska Wayn:** (952) 848-3700
**Khadka Soo Xaadiritaanka:** (952) 848-3702

**Webseedka:** southview.edinaschools.org

**Jadwallada Maalinlaha ah:** Liinki
**Bogga Waalidka:** Liinki
**Liiska Shaqaalaha:** Liinki

**Xafiiska Caafimaadka**
(952) 848-3715 | Liinki

**Adeegyada Ardayda**
(952) 848-4402 | Liinki

### Valley View Middle School

**Maamulaha:** Patrick Bass
**Kaaliyaha Maamulaha:** Erik Lowe
**Hormuudka Maamulka:** Kris Watson

**Ciwaanka:** 6750 Valley View Rd
**Saacadaha Dugsiga:** 9:20 a.m.–4:05 p.m.

**Xafiiska Wayn:** (952) 848-3500
**Khadka Soo Xaadiritaanka:** (952) 848-3502

**Webseedka:** valleyview.edinaschools.org

**Jadwallada Maalinlaha ah:** Liinki
**Bogga Waalidka:** Liinki
**Liiska Shaqaalaha:** Liinki

**Xafiiska Caafimaadka**
(952) 848-3500 | Liinki

**Adeegyada Ardayda**
(952) 848-3389 | Liinki

## Nidaamka Gudbinta Warbixin Qarsoodi ah – Wax Dheh

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waxay ka-qaybqaataan nidaamka Say Something Anonymous Reporting System, barnaamij badbaadada dugsiga ah oo awood u siinaya ardayda inay aqoonsadaan calaamadaha digniinta ee khataraha imaan kara una sheegaan si qarsoodi ah waxyaabaha ay ka walaacsan yihiin. Ardaydu waxay gudbin karaan talooyin 24 saacadood maalinti, 365 maalmood sanadki iyagoo ku gudbinaya taleefan lambarka 1-844-5-SAY-NOW, iyagoo adeegsanaya aabka moobilka, ama onlaynka halkan. Talooyinka waxaa dib u eega la-taliyayaal u tababaran dhibaatooyinka kuwaas oo la xiriiri doona maamulka dugsiga iyo, haddii loo baahdo, hay'adaha fulinta sharciga. Si ula kac ah u gudbinta talo been ah waa dembi halis ah waxayna keeni doontaa tallaabo edbin ah si waafaqsan buug-gacmeedkan.

## Saacadaha Imaanshaha iyo Dareerista

Ardayda waxay dhismaha soo geli karaan laga bilaabo saacadda 9 a.m. (20 daqiiqo kahor bilaabashada maalinta dugsiga). Qoysaska u baahan inay ardaygooda keenaan ka hor 9 a.m. waxay iska diiwaangelin karaan barnaamijkeenna Hornet Central. Ardayda aan soo raacin baska waa inaysan imaan dugsiga kahor wakhtigan (ilaa inay ka diiwaangashan yihiin Hornet Central mooyee).

Ardayda oo dhan waa inay ka baxaan dhismaha dhammaadka maalinta, haddii aanay ka diiwaangashanayn hawl dugsiga kadib ah oo la ilaalinayo.

## Faahfaahinta Soo Xaadiritaanka

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waxay raacaan tilmaamaha Be@School ee Hennepin County, kuwaasoo ku jira Siyaasadda 503. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Tilmaamaha Be@School.

### Soo Daahitaanada

Ardayda soo daahda sababti ay noqotaba (marka laga reebo baska oo soo daaho) waa inay iska qoraan xafiiska guud ka hor inta aysan aadin fasalka. Waalidiinta waxay u cudur-daari karaan soo daahitaanada iyagoo wacaya khadka soo xaadiritaanka ee xafiiska guud ama iyagoo adeegsanaya Infinite Campus (ka eeg qaybta ‘Maqnaanshiyaasha’ ee hoose).

### Sii-deynta Goorhore

Maqnaanshiyaasha cudur-daarka leh inta lagu jiro maalinta, sida ballamaha dhakhtarka ama dhakhtarka ilkaha, waalidiinta ama mas'uuliyiinta waa inay maqnaanshaha geliyaan Bogga Waalidka ama goorhore isticmaalaan khadka soo xaadiritaanka ee 24-ka saac ah.

### Soo Sheeg Maqnaansho

Fadlan isticmaal nidaamka soo xaadiritaanka ee onlaynka ah ee ku jira bartaada bogga waalidka ama wac khadka soo xaadiritaanka ee 24-ka saac ah ee dugsigaaga adigoo haysta macluumaadka soo socda:

- Magaca iyo fasalka ardayga
- Taariikhda maqnaanshaha iyo sababta maqnaanshaha
- Magacaaga iyo waxa aad u tahay ardayga

### Faahfaahinta Ku Aadan Maqnaanshiyaasha Cudur-daarka Leh/Lahayn

- Ka Soo Reebista Ciidaha Diimeed waxay ku kooban tahay 3 maalmood oo isku xiga halki gudashaba
- Maqnaanshaha “baski baan waayay” ma ahan maqnaansho cudur-daar leh
- Maqnaanshiyaasha Cudur-daarka Leh ee la xiriira xaaladaha caafimaadka waa sida soo socota:
    - Jirrada joogtada ah ee leh dukumiintiga (waa in ay diiwaanka ugu jirtaa xafiiska caafimaadka)
    - Xanuunka jirka ee guud (jirrada)
    - Ballanta caafimaadka, ilkaha, toosinta ilkaha, ama caafimaadka dhimirka (aan soconaynin wax ka badan ½ maalinta dugsiga)
    - Qalliinka ama isbitaal-dhigista (si toos ah ugala shaqee xafiiska caafimaadka wixii faahfaahin ah)
    - Bogsashada Caafimaadka (si toos ah ugala shaqee xafiiska caafimaadka wixii faahfaahin ah)
- Maqnaanshiyaasha Aan Cudur-daarka Lahayn waa sida soo socota:

    - Maqnaansho kasta oo uusan oggolaan waalidka/qofka masuulka ka ah ardayga (isagoo adeegsanaya bogga waalidka ama taleefanka soo xaadiritaanka ee 24-ka saac ah)
    - Ka shaqaynta hawlaha laga diray dugsiga ama isu diyaarinta imtixaanka
    - Fasaxyada nasiinada ah ee aan horay loo sii qaban-qaabin
- Hurdo la tagis, maqlid la'aanta alaamyada, waayitaanada basaska, wax-barashada ama shaqada isxilqaanka ah
- Jirrada timaada inta lagu jiro maalinta dugsiga - **MUHIIM!**
    - Ardayda **WAA INAY** maraan xafiiska caafimaadka wixi jirro ah ee loogu cudur-daarayo inay baxaan kala baraha maalinta dugsiga. Haddii canugaagu kula soo xiriiro maalinta dugsiga wax ku saabsan jirro, fadlan u sheeg inay aadaan xafiiska caafimaadka waxayna kooxdeena kaala soo xiriiri doontaa wixii ku saabsan tallaabooyinka xiga.

**Maxay Samayn Karaan Waalidiinta/Masuuliyiinta Si Ay Gacan Uga Gaystaan Dhiirigelinta Xaadiritaan Wanaagsan?**

- Qorshee fasaxyada nasiinada iyo ballamaha wakhti ka baxsan wakhtiga dugsiga.
- Deji wakhti joogta u ah xilliga seexashada, soo kicidda subixi, iyo gaadiidka lagu tagayo dugsiga si uu ardaygaagu u ilaaliyo wakhtiga maalin kasta.
- La soco xaadiritaanka ardaygaaga adigoo isticmaalaya bogga waalidka
- Dejiso yool xaadiritaan oo 95% ah ama ka badan sanad kasta (wax ka yar 9 maalmood oo dugsiga laga maqnaado sannadkii/1 maalin bishii).
- Soo sheeg maqnaanshaha ardaygaaga isla markiiba adigoo adeegsanaya bogga waalidka ama khadka xaadiritaanka ee 24 saac ah ee dugsigaaga.
- Dhammaan maqnaanshiyaasha/soo daahitaanada waxaa loo qoraa cudur-daar la'aan haddii waalidka/masuulka uusan gelin codsi maqnaansho isagoo adeegsanaya bogga waalidka ama khadka soo xaadiritaanka.

**Sidee Ayuu Dugsigu Gacan Uga Gaysan Doonaa Dhiirigelinta Xaadiritaan Wanaagsan?**

- Macallimiinteenna iyo shaqaalaha taageerada ardayda waxay si dhow ula socon doonaan xaadiritaanka.
- Qoysaska ayaa lala xiriiri doonaa haddii ardaygu uu si joogto ah u maqnaado iyo/ama uu soo daaho.
- Shaqaalaha dugsiga hoose waxay kala shaqeyn doonaan qoysaska in ay diyaariyaan qorshe guul looga gaarayo dugsiga.
- Arrimaha maqnaanshaha joogtada waxaa loo gudbin doonaa barnaamijka Be@School ee Hennepin County si ay wax uga qabtaan. Fadlan ka eeg xagga hoose si aad uga hesho dulmarka habka la-socodka iyo tebinta.

**Ogeysiis Muhiim ah:** Shuruudaha gobolka awgood ardayga waa in laga saaraa diiwaanka waxbarashada haddii uu maqnaado 15 maalmood oo isku xiga.

## Macluumaadka Kalandarka

Kalandarka dugsiga waxaa sanad kasta ansixiya guddiga dugsiga. Nuqulka kalandarka dugsiga iyo kalandarka dugsi kasta oo dhexe waxaa laga heli karaa xagga hoose.

### Kalandarka Degmada

Si aad u hesho dulmarka buuxa ee taariikhaha degmada oo dhan, oo ay ku jiraan maalmaha fasaxa ah, wakhtiyada nasashada, iyo maalmaha horumarinta xirfadda, fadlan booqo: www.edinaschools.org/calendar

### Kalandarada Dugsiyada Dhexe

Dugsi kasta oo dhexe waxaa sidoo kale ku jiri kara dhacdooyin u gaar ah dhismaha, sida shirarka, bandhigyada, iyo habeenada hawlaha. Fadlan u tixraac kalandarka dugsiga canugaaga xagga hoose:

- South View Middle School
- Valley View Middle School

**Qoraallo ku saabsan Jadwalka Maalinta A/B**
Dugsiyada South View iyo Valley View Middle labadaba waxay ku shaqeeyaan jadwal qayb-qayb ah. Ardayda waxay xiisadaha u dhiigtaan wareegto maalmo isu kala baddalaya Maalinta A / Maalinta B:

- Maalmaha A: Ardayda waxay dhigtaan hal xirmo oo xiisado ah
- Maalmaha B: Ardayda waxay dhigtaan xirmo kale oo xiisado ah

Xiisadaha waxaa loo qaataa maalin dhaaf, taasoo u oggolaanaysa xiisado waxbarasho oo dhaadheer iyo waxbarasho qoto dheer. Qoysasku waa inay ka tixraacaan jadwalka dugsiga si ay u ogaadaan in maalin ay tahay Maalinta ama Maalinta B, iyo sidoo kale wixii isbeddel ah ee lagu sameeyo jadwalka sababo la xiriira dhacdooyin gaar ah ama maalmo dugsi oo la soo gaabiyay.

## Cabashooyinka

Ardayda, waalidiinta/mas'uuliyiinta, shaqaalaha, ama dadka kale waxay walaacyada ama cabashooyinka u gudbin karaan degmada dugsiga. Cabashooyinku waxay noqon karaan midkood qoraal ama afka. Dadka waxaa lagu boorinayaa, balse aan qasab ku ahayn, inay cabasho qoraal ah u gudbiyaan heerka dhismaha, halki ay ku habboon tahay. Maamulaha ku habboon ayaa qoraal ugu jawaabi doona qoloda cabanaysa isagoo ka hadlaya jawaabta degmada dugsiga ee ku aaddan cabashadaas. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Cabashooyinka - Ardayda, Shaqaalaha, Waalidiinta, Dadka Kale (Siyaasadda 104) ee ku jira Buuggeena Siyaasadda Degmada

### Gudbinta Faallooyinka ama Walaacyada

**Fasalka**
Arrimaha fasalka waa in marka hore lagu hagaajiyaa macalinka. Haddii heerka koowaad ee wada-xiriirka uusan xallin arrinta, kormeeraha tooska ah, maamulaha dugsiga, ama kaaliyaha kormeeraha guud ayaa ah qofka xiga ee lala xiriirayo.

**Arrimaha Dugsiga**
Arrimaha dugsiga waa in marka hore lagu hagaajiyaa maamulaha. Arrimaha hawlgalka ama maamulka waxaa ugu fiican in lagu hagaajiyo shaqaalaha dugsiga ama shaqaalaha xafiiska degmada ee ugu dhow meelaaha ay khuseyso arrintu.

**Arrimaha Degmada**
Arrimaha degmada waa in lagu hagaajiyaa maamulaha mas'uulka ka ah barnaamijka ama adeegga ay khuseyso. Arrimaha hawlgalka ama maamulka waxaa ugu fiican in lagu hagaajiyo shaqaalaha dugsiga ama shaqaalaha xafiiska degmada ee ugu dhow meelaaha ay khuseyso arrintu.

## Maalmaha Waxbarashada Onlaynka ah

Haddii ay dhacdo in cimilada daran dartood loo baahdo in la xiro dugsiyada, degmadu waxay hirgelin kartaa Maalin Waxbarasho oo Onlayn ah si loo xaqiijiyo sii socoshada waxbarashada. Maalmahaan, ardaydu waxay joogaysaa guriga waxayna waxbarashada uga qaybqaadan doonaan baraha onlaynka ah ee dugsigooda (sida Schoology ama Seesaw), iyagoo raacaya tilmaamaha ay siiyaan macallimiintooda. Qoysaska waxaa lagu wargelin doonaa Maalin Waxbarasho oo Onlayn ah iyadoo la adeegsanayo hababka wada-xiriirka ee caadiga ah ee degmada, oo ay ku jiraan iimayl, wicitaan taleefan, fariimaha qoraalka ah, warbixinada webseedka, iyo warbaahinta maxalliga ah. Ardayda waxaa laga filayaa inay ka qaybqaataan hawlaha waxbarasho ee loo diray, waxaana la qaadaa soo xaadiritaanka maalinta. Si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah, fadlan booqo boggeena Xaaladaha Degdegga ah ee Cimilada iyo Xiritaanada Dugsiga.

## Hubinada Sooyaalka Taariikhda Shaqada

Degmada dugsiga waxay soo baari doontaa sooyaalka taariikhda dembi ee dhammaan codsadayaasha dalab shaqo ka hela degmada dugsiga. Degmada dugsiga waxa ay sidoo kale soo baari doontaa sooyaalka taariikhda dembi ee dhammaan shakhsiyaadka, marka laga reebo ardayda is-xilqaanka ku shaqeysa ee diiwaangashan, kuwaas oo la siiyo fursad ay ku bixiyaan adeegyo tababar ciyaareed ama adeegyo kale oo tababar tacliimeed oo ka baxsan manhajka dugsiga inay ka bixiyaan degmada dugsiga, iyadoon loo eegin in magdhow la bixiyay iyo in kale. Jagooyinkaan waxaa ka mid ah, balse aanay ku koobnayn, dhammaan tababarayaasha ciyaaraha, tababarayaasha hawlaha tacliimeed ee ka baxsan manhajka, kaaliyeyaasha, iyo la-taliyeyaasha. Degmada dugsiga waxay dooran kartaa inay soo baarto sooyaalka taariikhda dembi ee isxilqaamayaasha kale, qandaraaslayaasha madaxa-bannaan iyo shaqaalaha ardayda ah. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Siyaasadda Hubinada Sooyaalka Taariikhda Shaqada (siyaasadda 404) ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Helitaanka Loo Siman Yahay ee Tas-hiilaadka Dugsiga

Degmada dugsiga waxay samaysay madal furan oo kooban oo loogu talagalay ardayda dugsiga sare inay ku qabsadaan kulamo aan la xiriirin manhajka xilliyada aan casharrada la bixinayn. Degmada dugsiga wax ma ku kala takoori doonto ama ma diidi doonto marin-helka loo siman yahay ama fursad caddaalad ah iyadoo lagu salaynayo waxa ku jira hadalka, ha ahaado mid diimeed, mid siyaasadeed, mid falsafadeed, ama wax kale ee laga jeediyo kulammada noocan ah. Kulamadaan madasha furan ee kooban waxa ay noqon doonaan kuwo ikhtiyaari ah oo uu ardaygu bilaabo; ma noqon doonaan kuwo ay maalgelinayaan shaqaalaha ama wakiillada dugsiga; shaqaalaha ama wakiillada dugsigu waxay kulammada diiniga ah goobjoog ka ahaan doonaan oo keliya iyagoon ka qaybqaadanayn; kulammadu ma carqaladayn doonaan habsami-u-socodka hawlaha waxbarasho ee dugsiga dhexdiisa; iyadoona dadka aan dugsiga ka tirsanayn aysan maamuli doonin, xakamayn doonin, ugana qaybgeli doonin si joogto ah hawlaha kooxaha ardayda.

Dhammaan kulamada hoos yimaada qodobkan waa inay raacaan habraacyada ay dejisay degmada dugsiga. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Adeegsiga Loo Siman Yahay ee Ardayda ee Tas-hiilaadka Dugsiga (Siyaasadda 801) ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Khidmadaha

Waxyaabaha qaybta ka ah barnaamijka waxbarashada aasaasiga ah waxaa lagu bixiyaa lacago ka socda gobolka, federaalka, iyo heerka maxalliga ah kuwaasoo ardayga lagu siiyo si bilaash ah. Ardayda waxaa laga filayaa inay la yimaadaan qalin-qoriyaal, qalin-biiro, warqado, tirtirayaal, buugaagta qoraalka iyo sheeyaasha kale ee shakhsiyeed. Ardayda waxaa looga baahan karaa inay bixiyaan khidmado ama lacag shubis kale oo gaar ah, oo ay ku jiraan (ma ahan liis wax kasta soo koobaya):

- Khidmadaha ama lacagaha laga qaado ka-qaybgalka hawlaha ka baxsan manhajka, halkaasoo ka-qaybgalku uu yahay ikhtiyaari iyo halka khidmadaha ama lacagaha ay tahay ardaygu inuu bixiyo si uu u xaadiro ama uga qaybgalo hawl ka baxsan manhajka ay isku mid u yihiin ardayda oo dhan, iyadoon loo eegin in ardaygu uu ka diiwaangashan yahay dugsi dadweyne ama dugsi guriga lagu barto.
- Kharashka agabka loogu talagalay mashruuc fasal oo ka sarreeya shuruudaha ugu yar isla markaana uu ardaygu haysanayo.
- Lacagta dammaanadda ee loogu talagalay soo celinta agabka, sahayda, ama qalabka.
- Qalabka iyo dharka gaarka ah ee waxbarashada jireed iyo ciyaaraha.
- Sheeyaasha gaarka loo isticmaalo ama alaabaha ardaygu ikhtiyaar u haysto inuu iibsado sida daabacaadaha ardayga iyo buugaagta xusuusta sanadlaha ah.
- Safarrada aqoon kororsiga ah ee loo arko inay dheeraad ka yihiin barnaamijka waxbarashada ee degmada.
- Khidmadaha ama lacagaha lagu galo ama looga qaybqaato hawlaha ama barnaamijyada ka baxsan manhajka ee ikhtiyaariga ah.
- Caymiska caafimaadka iyo shilka ee ardaygu u iibsado iskiisa.
- Isticmaalka qalabka muusigga ee ay leedahay ama ay soo kiraysatay degmada dugsiga.
- Gaadiidka lagu tago loogana soo laabto dugsiga ee ardayda ku nool labo mayl gudahood masaafo u jirta dugsiga.
- Gaadiidka ardayda ee lagu tago loogana soo laabto hawlaha ka baxsan manhajka ee ikhtiyaariga ah oo lagu bixiyo meelo aan dugsiga ahayn.

Ardayda waxaa laga qaadi doonaa kharashka buugaagta daabacan, buugaagta shaqada, buugaagta maktabadda, iyo qalabka ee lumay ama waxyeelloobay. Haddii buugaagta/agabka aan la keenin dhammaadka simistarka ama sanad dugsiyeedka hadba sidi loo baahdo, khidmad ayaa la gelin doonaa Infinite Campus waxaana waalidiinta iyo ardayda loo diri doonaa iimayl xusuusin ah. Degmada dugsiga ayaa iska dhaafi karta khidmad ama lacag-dhigis la iska rabo haddii ardayga iyo waalidka/mas'uulka aysan awoodin inay bixiyaan. Wixi macluumaad dheeraad ah, la xiriir xafiiska guud ee dugsiga ardaygaaga.

## Ururinta Lacagaha

Dhammaan hawlaha ururinta lacagaha ee ay sameeyaan kooxaha ardayda iyo ururada iyo/ama kooxaha waalidiinta waa inay marka hore helaan oggolaanshaha maamulaha dugsiga. Ka-qaybgalka hawlaha ururinta lacagaha ee uusan dugsigu ansixin waxay xadgudub ku tahay siyaasadda degmada dugsiga. Qalqaalada ardayda ama shaqaalaha ee ardayda ee ku aadan hawlo aan la xiriirin dugsiga lama oggolaan doono inta lagu jiro maalinta dugsiga. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Siyaasadda Ururinta Lacagaha Ardayga (Siyaasadda 629) ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Hadiyadaha Shaqaalaha

Shaqaalaha looma oggola inay qalqaalsadaan, aqbalaan, ama qaataan hadiyad ka socota arday, waalid, ama shakhsi ama urur kale, haddii hadiyaddaasi uu qiimaheedu ka badan yahay qiimaha caadiga ah. Waalidiinta/mas'uuliyiinta iyo ardayda waxaa lagu boorinayaa inay qoraan warqado iyo farriimo mahadnaq ah ama ay bixiyaan waxyar oo mahadnaq ah. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Hadiyadaha Shaqaalaha iyo Xubnaha Guddiga Dugsiga (Siyaasadda 421) ee ku jira Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Dabaaldagyada Ciidda iyo Xafladaha

Degmada waxaa ka go'an joogtaynta jawi ixtiraam badan oo loo wada dhan yahay oo la xiriira arrimaha diinta ee dugsiyada. Dugsiyadu ma dhiirigeliyaan mana ka-horyimaadaan caqiido diimeed oo gaar ah ama caqiido la'aanta, balse waxay dhiirigeliyaan fahamka, dulqaadka, iyo ixtiraamka aragtiyaha kala duwan. Waxbarista waxaa ku jiri kara barashada doorka ay diintu ku leedahay taariikhda, dhaqanka, suugaanta, iyo farshaxanka, iyadoo shuruud laga dhigayo in loo soo bandhigo qaab dhexdhexaad ah oo aan dhinacna u janjeerin. Muujinta diimeed ee ardayda ayaa la oggol yahay iyadoo la raacayo tilmaamaha ku habboon, waxqabadyada dugsigana waxaa ku jiri kara waxyaabo diini ah keliya marka ay taageerayaan ujeeddooyinka waxbarashada isla markaana aan loogu talagelin in lagu taageero nidaam caqiido oo gaar ah. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Siyaasadda Diinta (Siyaasadda 609) ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Wareysiyada Ardayda ee ay Sameynayaan Hay'ado Dibedda ah

Dad kale ma wareysan karaan ardayda inta lagu jiro maalinta dugsiga dadkaasoo aan ahayn waalidiinta/mas'uuliyiinta ardayga ama saraakiisha, shaqaalaha, iyo/ama wakiillada degmada dugsiga, marka laga reebo wixii sharciga iyo/ama siyaasadda dugsiga lagu qeexay. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Wareysiyada Ardayda ee ay Sameynayaan Hay'ado Dibedda ah (Siyaasadda 519) ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Qorshaha Helitaanka Luuqadda

Degmadu waxay meelmarisay Qorshaha Helitaanka Luuqadda oo ay ku jiraan habab iyo habraacyo lagu caawinayo ardayda iyo dadka waaweyn ee wax kula xiriira luuqad aan ahayn Ingiriisiga. Qorshahani wuxuu bixinayaa macluumaad ku saabsan xuquuqaha helitaanka adeegga luqadda, qalabka, habraacyada, iyo kheyraadka loo heli karo ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha degmada.

Koobiga qorshahan iyo macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa bogga Qorshaha Helitaanka Luuqadda ee webseedka.

## Maktabadda iyo Xarunta Warbaahinta

Xarumaha warbaahinta ee labada dugsi ee dhexe waxay u adeegaan sidi goobo waxbarasho oo soo dhawayn leh isla markaana dabacsan halkaasoo ardaydu ay wax ku akhrisan karaan, cilmi-baaris ku samayn karaan, wada-shaqayn karaan, isla markaana ay ku sahmin karaan fikrado cusub. Goobahani waxay taageeraan waxbarashada ardayda iyagoo marin u siinaya buugaag, kheyraad dhijitaal ah, iyo hagis ka socota shaqaale aqoon leh, kuwaas oo ka caawiya ardayda inay dhisaan xirfadaha la xiriira wax waydiinta, hal-abuurka, iyo isticmaalka mas'uuliyadda leh ee macluumaadka. Xarumaha warbaahintu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah ballanqaadka dugsi kasta ee kobcinta xiisaha waxbarashada, hal-abuurka, iyo barashada nolosha oo dhan ah oo lagu helayo jawi taageero leh. Qoysasku waxay ka ogaan karaan waxbadan oo ku saabsan xarunta warbaahinta ee dugsi kasta iyagoo isticmaalaya liinkiyada hoose:

- South View Middle School
- Valley View Middle School

## Qadada iyo Quraacda

Degmadu waxay kala shaqaysaa Chartwells inay bixiso xulashooyin cunto oo caafimaad qaba oo loogu talagalay ardayda oo dhan. Cuntooyinka waxaa lagu diyaariyaa laguna bixiyaa National School Lunch Program (Barnaamijka Qadada Dugsiyada ee Qaranka), waxayna Edina qayb ka tahay Minnesota Free School Meals Program (Barnaamijka Cuntada Dugsiga ee Bilaashka ah ee Minnesota). Ardayda oo dhan waxaa fursad loo siiyaa inay helaan **hal quraac oo bilaash ah** iyo **hal qado oo bilaash ah** maalin kasta. Si ay u helaan qadada bilaashka ah, ardaydu waa inay saxankooda ku haystaan ugu yaraan saddex (3) kooxood oo cunto oo kala duwan, waxayna dooran karaan ugu badnaan shan (5) kooxood. Mid ka mid ah cuntooyinkaan waa inuu ahaadaa ½ koob oo miro ama khudaar ah. **Xulashooyinka cuntada ee gaarka loo iibsado sida cuntada fudud ama cabitaanada aan ka ahayn caanaha, iyo cuntooyinka labaad ama caanaha dheeraadka ah, dhammaantood waa in lagu bixiyaa lacag laga bixinayo akoonka cuntada ee ardayga**.

Akoonada cuntada, oo ay ku jiraan taariikhda wax-iibsiga iyo xulashooyinka maalgelinta, ayaa laga heli karaa Infinite Campus. Ardayda waxay u baahnaan doonaan inay geliyaan PIN-ka akoonkooda si ay wax cunto ah uga helaan maqaayadda.

Ardaydu waxay dooran kartaa inay qado ka soo qaataan guriga. Si loo joogteeyo deegaan dugsi oo badbaado ah, qadada looma oggola in dugsiga ay soo gaarsiiyaan ururo dibadda ah (sida DoorDash ama adeegyo la mid ah). Waalidiinta/masuuliyiinta waa laga aqbalaa inay qadada ardaygooda u dhigaan xafiiska guud. Waxaanu codsanaa in qoysaska kaliya ay qadada u keenaan ardaygooda(ardaydooda) oo aysan u keenin ardayda kale.

Qadada waa in lagu cunaa oo kaliya meelaha loogu talagalay. Wakhtiyada qadada waa ay ku kala duwan yihiin fasalka iyo heerka fasalka. Ardayda waxaa maalinta koowaad ee dugsiga la ogeysiin doonaa wakhtiga loo qoondeeyay qadadooda.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka cuntada ee degmada, ayna ku jiraan liisaska cuntada, qiimayaasha cuntada gaarka loo iibsado, iyo sida lacago loogu shubo koontada cuntada ee ardayga, fadlan ka eeg bogga webseedka ee Adeegyada Cuntada iyo Nafaqada.

## Farriimo Ku Socda Ardayda iyo Qoysaska

Ardayda waxay xog muhiim ah iyo warbixinno ka helaan dugsigeena iyadoo loo marinayo habab kala duwan oo wada-xiriirka dugsiga ah. Ardaydu waa inay si joogta ah u eegaan akoonka iimaylka ee uu bixiyay dugsigooda, maadaama macalimiinta iyo shaqaalaha laga yaabo inay farriimo iyo warbixinno si toos ah ugu diraan ardyada. Intaa waxaa dheer, ogeysiisyada iyo xusuusinada waxaa lala wadaagaa inta lagu jiro wakhtiga La-talinta, iyada oo la adeegsanayo ogeysiisyada maalinlaha ah ee dugsiga iyo weliba madasha Schoology.

Haddii daryeele uu u baahdo inuu farriin gaarsiiyo ardaygooda inta lagu jiro maalinta dugsiga, waa inay la xiriiraan xafiiska guud ee dugsiga, waxayna shaqaalahu hubin doonaan in farriinta la gaarsiiyo. Iyadoo ay ugu wacan tahay siyaasadeena taleefanka gacanta ee “Away for the Day”, ardayda lagama filayo inay isticmaalaan aaladaha gaarka ah inta lagu jiro maalinta dugsiga, qoysaskuna waa inaysan si toos ah ula xiriirin ardayga inta lagu jiro wakhtiga waxbarashada. Qoysaska waxaa lagu boorinayaa inay xusuusiyaan ardayda inay ku xirnaadaan baraha wada-xiriirka ee dugsiga si ay u helaan macluumaadka iyo fursadaha muhiimka ah.

### Furashada helitaanka farriimaha qoraalka ah ee ka socda Dugsiyada Dadweynaha ee Edina

EPS waxay isticmaashaa nidaamka ogeysiisyada elektaroonigga ah, School Messenger, si ay farriimo toos ah ugu dirto qoysaska Degmada, iyadoo adeegsanaysa iimayl, farriin cod ah, ama farriin qoraal ah.

- Qoraal ahaan ereyga “YES” u dir 67587 adigoo ka diraya aalad kasta oo fiilo la'aan ah oo aad rabto inaad farriimaha ku hesho.
- Xaqiiji in dhammaan taleefan lambarada aad rabto inaad ku hesho farriimaha ay ku qoran yihiin xogtaada xiriirka ee Infinite Campus.

## Takoor La'aanta

Degmada dugsiga waxaa ka go'an waxbarasho loo dhan yahay iyo bixinta fursad waxbarasho oo ay u wada siman yihiin ardayda oo dhan. Degmada dugsiga ma samayso takoor ku salaysan isir, midab, caqiido, diin, asal qaran, jinsi, xaaladda guurka, xaaladda waalidnimo, xaalad ku aadan helitaanka kaalmada dadweynaha, naafanimada, rabitaanka jinsi, oo ay ku jiraan aqoonsiga iyo muujinta jinsiga, ama da'da marka ay fulinayso barnaamijyadeeda iyo hawlaheeda. Guddiga dugsiga wuxuu u xilsaaray Sonya Sailer, Agaasimaha Fulinta ee HR, inay noqoto sarkaaladda xuquuqda aadanaha ee degmada si ay u maamusho wixii su'aalo ah ee la xiriira arrimaha ka hortagga takoorka:

**Sonya Sailer**
**Agaasimaha Fulinta ee Shaqaalaha**
sonya.sailer@edinaschools.org
(952) 848-4911

Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Siyaasadaha 103, 521, 522, iyo 528 ee ku jira Buuggeena Siyaasadda Degmada.Foomka Ka Warbixinta Takoorka, Dhibaateynta, iyo Rabshadda waxaa laga heli karaa bogga webseedka Qoysaska.

## Ogeysiinta Habdhaqanka Rabshadda leh ee Ardayda

Degmada dugsiga waxay ogeysiis siin doontaa macallimiinta iyo shaqaalaha kale ee ku habboon ee degmada dugsiga ka hor inta aan ardayda taariikhda u leh habdhaqanka rabshad wata la gayn fasalladooda. Kahor inta aan ogeysiiska la siin, mas'uuliyiinta degmadu waxay waalidka ama qofka masuulka ka ah ardayga ku wargelin doonaan in ogeysiiska la bixin doono. Waalidiinta/masuuliyiinta ardayga waxay xaq u leeyihiin inay dib u eegaan oo ay ka horyimaadaan diiwaannada ilmahooda, oo ay ku jirto xogta diiwaangelinaysa taariikhda habdhaqanka rabshadda wata. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Ogeysiinta Shaqaalaha ee Habdhaqanka Rabshadda Leh ee Ardayda (Siyaasadda 529) ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Shirarka Macalimiinta Waalidka

Sanad kasta, waxaan qoysaska siin doonaa fursadaha soo socda si ay macallimiinta ula shaqeeyaan.

### Habeenka Manhajka

La Kulan oo Salaan adigoo raacaya jadwalka ardaygaaga, ee la bixiyo kahor inta uusan bilaaban sanad dugsiyeedka.

### Shirarka La-talinta

Bisha Sibteembar, qoysaska waxay la kulmaan la-taliyaha ardaygooda.

### Shirarka Soo Jireenka ah

Bisha Nofeembar (fogaan arag iyo fool-ka-fool ayaa la bixiyaa), qoysaska iyo ardayda waxay dooran karaan inay la kulmaan macallimiintooda.

**Shirarka uu Hoggaamiyo Ardayga**

Bisha Maarso, ardaydu waxay horumarkooda la wadaagaan qoysaskooda inta lagu jiro shirarka uu hoggaamiyo ardayga, ee ay taageeraan la-taliyeyaasha.

## Isxilqaamayaasha Waalidka

Qoysasku waxay door muhiim ah ka ciyaaraan taageeridda dugsiyadeena, waana soo dhaweyneynaa in waalidiinta/mas'uuliyiinta ugu lug yeeshaan siyaabo kala duwan. Fursadaha waxaa ka mid noqon kara isu xilqaamidda fasallada, taageeridda dhacdooyinka dugsiga, Ka qayb-qaadashada Ururka Waalidiinta iyo Macallimiinta (PTO), ama la-shaqeynta barnaamijyada dugsiga iyo degmada. Fursadahani waxay xoojiyaan xiriirka u dhexeeya guriga iyo dugsiga waxayna kobciyaan waayo-aragnimada guud ee ardayga. Qoysaska danaynaya inay isu xilqaamaan ama inay ku lug yeeshaan waxay waxbadan ka ogaan karaan iyagoo adeegsanaya liinkiyada hoose:

- South View Middle School – Ku Lug Yeelo
- Valley View Middle School – Ku Lug Yeelo

Waxaanu ka mahadnaqaynaa siyaabo badan oo ay qoysasku ku taageeraan dugsiyadeena waxaana ku boorinaynaa dhammaan dadka danaynaya inay sahmiyaan fursadaha ay kaga qayb qaadan karaan.

## Ballan-qaadka Daacadnimada

Ardayda dhigata Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waxay ka qaybqaataan Ballan-qaadka Daacadnimada si joogta ah iyadoo qayb ka ah hab-socodka dugsiga. Labada dugsi ee dhexe, ballanqaadka waxaa la akhriyaa toddobaadkiiba mar. Ka-qaybgalku waa ikhtiyaari, ardayduna waxay dooran kartaa in aanay ka qaybqaadan sababo shakhsi awgood. Dhammaan ardayda iyo shaqaalaha waxaa laga filayaa inay ixtiraamaan doorashada qof kasta ee ku aadan ka-qaybgalka, iyagoo gacan ka geysanaya ilaalinta deegaan dugsi oo ku dhisan ixtiraam loona wada dhan yahay. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Ballan-qaadka Daacadnimada (Siyaasadda 531) ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Hawlaha Dugsiga

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waxay bixiyaan fursado loogu talagalay ardayda inay ku dabagalaan xiisaha gaarka ah ee gacan ka gaysanaya caafimaadkooda jirka, maskaxda, iyo shucuurta. Waxbarashada rasmiga ah ayaa ah mudnaanta degmada dugsiga. Ardayda ka qaybqaadata hawlaha uu taabageliyo dugsiga waxaa laga filayaa inay si macquul ah u matalaan dugsiga iyo bulshada. Dhammaan xeerarka ku aadan habdhaqanka ardayga iyo anshaxa ardayga ayaa khuseeya hawlaha dugsiga. Dhammaan daawadayaasha daawanaya hawlaha uu taabageliyo dugsiga waxaa laga filayaa inay u dhaqmaan si habboon. Ardayda iyo shaqaalaha ayaa la edbin karaa. Waalidiinta/masuuliyiinta iyo daawadayaasha kale ayaa lagu qaadi karaa tallaabooyin ciqaabeed haddii ay ku kacaan falal aan habboonayn, sharci-darro ah, ama aan waafaqsanayn anshaxa ciyaaraha inta lagu guda jiro hawlahaan ama dhacdooyinkaan.

Degmada Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waxay xubin ka tahay Horyaalka Dugsiyada Sare ee Gobolka Minnesota (MSHSL). Ardayda ka-qaybqaadata hawlaha MSHSL waa inay adeecaan xeerarka MSHSL. Degmadu waxay dhaqangelin doontaa dhammaan xeerarka MSHSL inta lagu jiro sanad dugsiyeedka iyo xilliga xagaaga hadba sida ay u khuseeyaan. Shaqaalaha qabanqaabiya hawlaha MSHSL ayaa ardayda iyo waalidiinta/mas'uuliyiinta kala hadli doona xeerarka khuseeya, ciqaabaha, iyo fursadaha jira ka hor inta aanay hawl bilaaban. Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan xeerarka MSHSL iyo shuruudaha uqalmitaanka ardayga, la xiriir Troy Stein.

**Troy Stein**
**Agaasimaha Ciyaaraha**
troy.stein@edinaschools.org

Marka laga yimaado hawlaha degmada, labadaba Valley View iyo South View Middle Schools waxay bixiyaan naadiyo, hawlo ka baxsan manhajka, iyo ciyaaro kala duwan oo loogu talagalay inay ardayda ka caawiyaan inay sahmiyaan waxyaabaha ay xiiseeyaan, dhisaan xirfadahooda, isla markaana ay xiriir la sameystaan asaagooda. Fursadaha waxaa ka mid noqon kara kooxaha tacliinta, fanka iyo bandhigyada, hoggaaminta ardayda, kooxaha u heellan adeegga bulshada, iyo naadiyada ku dhisan danaha gaarka ah, oo ay wehliyaan barnaamijyo lagu bixiyo Waxbarashada Bulshada. Ka-qaybgalka hawlaha waxay ardayda ka caawisaa inay horumariyaan kalsoonida, shaqo kooxeedka, iyo dareen ka tirsanaansho ee bulshada dugsiga dhexdeeda. Qoysasku waxay ka ogaan karaan waxbadan oo ku saabsan fursadaha laga heli dugsi kasta iyagoo isticmaalaya liinkiyada hoose:

- Hawlaha iyo Naadiyada South View Middle School
- Hawlaha iyo Naadiyada Valley View Middle School

## Habraacyada Xiritaanka Dugsiga

Dugsiga ayaa la baajin karaa marka uu kormeeraha guud uu aaminsan yahay in cimilo aad u daran ama xaalado kale ay khatar gelinayaan badqabka ardayda iyo shaqaalaha. Kormeeraha guud wuxuu go'aamin doonaa xilli hore oo maalinta ah ilaa inti macquul ah wixi ku saabsan xiritaanka dugsiga ama dhismayaasha dugsiga. Ogeysiisyada xiritaanka dugsiga waxaa lagu bixin doonaa farriin cod oo otomaatig ah, iimayl, qoraal, webseedka degmada, iyo iyadoo loo marinayo warbaahinta maxalliga ah. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo boggeena Xaaladaha Degdegga ah ee Cimilada iyo Xiritaanada Dugsiga.

## Saraakiisha Kheyraadka Dugsiga

Hal ama ka badan oo ah Saraakiisha Kheyraadka Dugsiga (SRO-yo) ayaa joogi kara wakhtiyada kala duwan dugsi kasta oo degmo dhexdiisa. Degmadu waxay heshiis kula jirtaa Magaalada Edina si ay u bixiso adeegyada saraakiisha nabadgelyada ee tababaran ee leh shatiga, inta lagu guda jiro maalinta waxbarashada caadiga ah. Waajibaadka saraakiisha SRO waxaa lagu dejiyay siyaasadda degmada waxaana ka mid ah, balse aanay ku koobnayn, kobcinta jawi dugsi oo wanaagsan iyada oo la dhisayo xiriirro iyo wada-xiriir furan, ilaalinta ardayda, shaqaalaha, iyo dadka soo booqda xarunta dugsiga iyadoo laga ilaalinayo falalka dambiyada, iyo la-shaqeynta sarkaalka maamulka xaaladaha degdegga ah iyo amniga dugsiga ee degmada wixi ku aaddan arrimaha amniga dugsiga.

Saraakiisha SRO ma isticmaali karaan xoog ama awoodda xilka ay hayaan si ay u fuliyaan xeerarka ama siyaasadaha dugsiga ama ay uga qaybqaataan hirgelinta edbinta la xiriirta jebinta xeerarka dugsiga. [Siyaasadda 507.5 ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada](#)

## Baaritaanada

Iyadoo loo danaynayo badbaadada ardayga lana xaqiijinayo in dugsiyadu ay ka caagan yihiin daroogada, maamulka dugsiga ayaa samayn kara baaritaano. Ardaydu waxay ku xadgudubtay siyaasadda dugsiga marka ay alaab mamnuuc ah ku wataan jirkooda ama alaabtooda gaarka ah ama ay ku kaydiyaan miisaska, lookooyinka, ama baabuurta ku baakiman dhulka dugsiga. “Mamnuuc ah” micnaheedu waa shey aan la oggolayn, haysashadooda ay mamnuucday siyaasadda degmada dugsiga iyo/ama sharcigu. Haddii baaritaan lagu ogaado alaab mamnuuc ah, mas'uuliyiinta dugsiga ayaa la wareegi doona sheyga(sheeyaasha) oo, marka ay habboontahay, ku wareejin doonaan mas'uuliyiinta sharciga si ay go'aan kama dambays ah uga gaaraan. Ardayda lagu helo ku xadgudubka siyaasadan waxaa loo edbinayaa si waafaqsan siyaasadda degmada dugsiga ee “Edbinta Ardayga” ([Siyaasadda 506](#)), oo ay ka mid noqon karaan hakin, cayrin, iyo ruqsayn, iyo, marka ay habboon tahay, ardayga waxaa loo gudbin karaa mas'uuliyiinta dhinaca sharciga.

### Lookooyinka iyo Alaabta Gaarka ah ee Ku Jirta Lookada

Sida uu dhigayo sharciga Minnesota, lookooyinka dugsiga waa hantida degmada dugsiga. Marna degmada dugsigu ma wareejinayso maamuulkeeda gaarka ah ee lookooyinka ay u bixisay inay caawiyaan ardayda. Saraakiisha dugsiga ayaa eegi kara gudaha lookooyinka sababti ay noqotaba wakhti kasta, ogeysiin la'aan, iyada oo aan la helin oggolaansho arday, iyo iyada oo aan la haysan amar lagu baaro. Alaabta gaarka ah ee ardayda ee ku dhex jirta lookada dugsiga waxaa la baari karaa oo keliya marka ay mas'uuliyiinta dugsigu qabaan shaki macquul ah oo ku saabsan in baaritaanku uu soo saari doono caddayn muujinaysa in la jabiyay sharciga ama xeerarka dugsiga. Isla marka ay macquul tahay kadib baaritaanka alaabta gaarka ah ee ardayga, mas'uuliyiinta dugsigu waxay ogeysiin doonaan ardayda laga baaray lookooyinkooda in baaritaan la sameeyay, marka laga reebo haddii shaacinta arrintaas ay carqaladeyn karto baaritaan ay wadaan booliiska ama mas'uuliyiinta dugsiga.

### Miisaska

Miisaska dugsiga waa hantida degmada dugsiga. Marna degmada dugsigu ma wareejinayso maamuulkeeda gaarka ah ee miisaska ay u bixisay inay caawiyaan ardayda. Saraakiisha dugsiga ayaa eegi kara gudaha miisaska sababti ay noqotaba wakhti kasta, ogeysiin la'aan, iyada oo aan la helin oggolaansho arday, iyo iyada oo aan la haysan amar lagu baaro.

### Alaabta Gaarka Loo Leeyahay iyo Jirka Ardayga

Alaabta gaarka ah ee arday iyo/ama jirka ardayga waxaa la baari karaa oo keliya marka ay mas'uuliyiinta dugsigu qabaan shaki macquul ah oo ku saabsan in baaritaanka lagu ogaan doono in la jabiyay sharciga ama xeerarka dugsiga. Baaristu waxay noqon doontaa mid macquul ah xagga baaxadeeda iyo faro-gelinteeda.

## Aqoonsiyada Ardayda

Arday kasta waxaa la siin doonaa kaar aqoonsi ah oo ay ku jiraan sawir, baarkoodh, iyo xogta kale ee aqoonsiga. Ardaydu waa inay sitaan kaarkan wakhti kasta marka ay joogaan dugsiga iyo hawlaha dugsiga. Ardayda waxay kaararkaan u isticmaali karaan hawlaha sida: bixinta qadada, ku amaahashada buugaagta/agabka ee xarunta warbaahinta, ama ku gelitaanka dhacdooyinka dugsiga (sida xafladaha, qoob-ka-ciyaarka, iwm.). Kaararka lumo waxaa Xarunta Warbaahinta looga beddelan karaa khidmad dhan $5.

## Daabacaadaha iyo Agabka Ardayga

Siyaasadda degmada dugsiga waa in lagu ilaaliyo xuquuqda xorriyadda hadalka ee ardayda iyadoo, isla markaana, la ilaalinayo waajibka saaran degmada ee ah inay bixiso jawi waxbarasho oo ka caaggan carqaladaha. Dhammaan daabacaadaha dugsiga waxaa kormeera maamulaha dhismaha iyo/ama taabageliyaha. Daabacaadaha uusan taabagelin dugsigu lama qaybin karo iyadoo aan oggolaansho hore la helin.

### Boorarka iyo Calaamadaha

Dhammaan boorarka ama calaamadaha lagu soo bandhigo gudaha ama bannaanka dhismaha waa inay oggolaansho hore ka haystaan maamulaha dhismaha.

## Diiwaanada Ardayga

Diiwaannada ardayda waxaa loo kala saaraa kuwo bannaanka yaalla, kuwo gaar ah, ama kuwo sir ah. Shuruucda gobolka iyo federaalka waxay diiwaanada ardayga ka ilaaliyaan fiirinta ama isticmaalka aan la fasixin waxayna siinayaan waalidiinta/mas'uuliyiinta iyo ardayda xaqa u leh xuquuqo gaar ah. Xagga ujeedooyinka diiwaanada ardayga, arday “uqalma” waa mid da'diisu ay tahay 18 sano ama ka wayn ama ka diiwaangashan machad waxbarasho oo dugsiga sare kadib ah. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Ilaalinta iyo Asturnaanta Diiwaanada Ardayga (Siyaasadda 515) ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Ra'yi Ururinada Ardayga

Marmar, degmada dugsigu waxay adeegsataa ra'yi ururino si ay u hesho fikradaha ardayda iyo xog ku saabsan ardayda. Si aad u hesho xogta dhammeystiran ee xuquuqaha waalidka/masuuliyiinta iyo ardayda u qalanta wixi ku saabsan ra'yi ururinada, ururinta iyo u isticmaalka macluumaadka ujeeddooyin suuq-geyn ah, iyo baaritaanno jireed oo gaar ah, fadlan booqo Ra'yi Ururinada Ardayga (Siyaasadda 520) ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Gaadiidka Ardayda ee Dugsiyada Dadweynaha

Degmada dugsiga waxay bixin doontaa gaadiid, oo ay kharashka bixinayso degmada dugsigu, dhammaan ardayda deegaanka ee ku nool masaafo dhan hal mayl ama ka badan oo u jirta dugsiga. Gaadiidka waxaa la bixin doonaa dhammaan maalmaha dugsiga ee jadwalka caadiga ah ku qoran ama maalmaha dib laga samaynayo wixi dhaafay.

Gaadiid lama bixin doono inta lagu jiro fasaxa dugsiga xagaaga, marka laga reebo duruufo gaar ah. Degmada dugsigu gaadiid ma siin doonto ardayda lagala noqday mudnaanta gaadiidka ama si ikhtiyaar ah uu isaga dhaafay waalidka ama masuulka ardayda.

Degmada dugsiga waxay ardayda siin kartaa gaadiid ay ku tagaan kagana soo laabtaan hawlaha ka baxsan manhajka. Ilaa heerka degmada dugsiga ay bixiso gaadiidka hawlaha ka baxsan manhajka, degmadu waxay qaadi kartaa lacag ku saabsan gaadiidka ardayda ay ku tagaan kagana soo laabtaan hawlaha ka baxsan manhajka iyo safarrada aqoon kororsiga ah ee ikhtiyaariga ah ee lagu aado meelaha aan dugsiga ahayn.

Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo webseedkeena bogga Gaadiidka.

## Kheyraadka Tignoolajiyadda ee Ardayda/Qoysaska

### Portal-ka (Bogga Waalidka/Bogga LaunchPad)

Portal-ka waa meesha laga galo lagana cusboonaysiiyo macluumaadka muhiimka ah guud ahaan wakhtiga canugaaga ee Dugsiyada Dadweynaha ee Edina. Waxaad boggaas geli kartaa adigoo isticmaalaya liinkigaan .

### Infinite Campus

Infinite Campus ayaa ah nidaamkeenna xogta ardayga halka Schoology uu yahay fasalkeena waxbarasho ee onlaynka ah gudaha Dugsiyada Dadweynaha ee Edina. Labadaanba waxaa laga heli karaa bartaada Parent Portal. Haddii aad dhib kala kulanto gelitaanka, iimayl u dir parent.por tal@edinaschools.org si aad uga hesho caawimo.

Infinite Campus waa halka aad ka geli karto kana cusboonaysiin karto:

- Warbixinnada & buundooyinka
- Xogta xiriirka shakhsiga ah
- Lacago-bixinta cuntada dugsiga
- Diiwaannada caafimaadka ardayga
- Jadwallada tacliinta
- Diiwaanada soo xaadiritaanka
- Gaadiidka
- Foomamka Onlaynka ah

### Schoology

Schoology waa halka aad ka geli karto waxyaabaha soo socda ee ardaygaaga:

- Fasallada onlaynka ah
- Leyliyada fasalka

- Ogeysiisyada ardayga
- Macluumaadka kalandarka waxbarashada

### Safarka

Qoysaska ardayda ee u safraya dibedda Minnesota 15 maalmood oo dugsi oo isku xiga ama ka badan waa inay la xiriiraan xafiiska Dugsiga Sare ee Edina ka hor inta aysan safrin. Sida ay qabto hagista 2025-2026 ee ka socota Waaxda Waxbarashada ee Minnesota, iyo sida ay dhigayso siyaasadda degmada, ardayda waa in midkood laga saaraa diiwaanka inta ay ka maqan yihiin gobolka, ama qoysasku waa in ay bixiyaan kharashka waxbarashada ee muddadaas.

### Duubista Muuqaalka iyo Maqalka

Si taageero loo siiyo deegaan dugsi oo badbaado iyo ammaan ah, degmadu waxay isticmaashaa nidaamyo fiidiyow iyo kuwa elektaroonig ah oo lagu kormeero hantida dugsiga, oo ay ku jiraan gudaha dhismayaasha dugsiga, barxadaha dugsiga, iyo basaska dugsiga. Nidaamyadani waxaa loo isticmaalaa in lagula socdo dhaqdhaqaaqa, looga hortago waxna looga qabto walaacyada la xiriira badbaadada, laguna ilaaliyo ardayda, shaqaalaha, iyo hantida degmada. Muuqaalka la duubay waxaa dib-u-eegi kara maamulayaasha dugsiga iyo, marki ay habboon tahay, lala wadaagi karaa hay'adaha sharci-fulinta si waafaqsan habraacyada degmada iyo sharciyada khuseeya. Adeegsiga la socoshada waxaa loo qabtaa qaab ixtiraamaya asturnaanta ardayga iyadoo mudnaanta la siinayo badqabka guud ee bulshada dugsiga. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Hawlaha iyo Ganacsiga Aan Ahayn Waxbarashada (Siyaasadda 717) ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Qaybta 2: Macluumaadka Tacliinta

### Qishka iyo Koobiyaynta Hawlaha Dadka Kale

Koobiyaynta iyo qishka waxaa loo tixgeliyaa inay yihiin noocyada khiyaanada waxbarashada waxaana si adag loogu mamnuucay siyaasadda degmada. Tani waxaa ka mid ah, balse aanay ku koobnayn, koobiyaynta hawl, isticmaalka kheyraad aan la fasixin, u gudbinta fikradaha qofkale sidi inay yihiin kuwaaga, ama wada-shaqaynta aan habboonayn ee leyliyada iyo imtixaanaadka. Ujeedada laga leeyahay filashadani waa in lagu xaqiijiyo caddaaladda lana ilaaliyo daacadnimada geeddi socodka waxbarashada. Ku xadgudubyada waxay keeni karaan cawaaqib tacliimeed, iyo sidoo kale tallaabooyin edbin ah oo ay darnaantoodu kordhi karto marka xadgudubyada ay soo laalaabtaan. Si aad u hesho xog faahfaahsan, ka eeg sheyga #30 ee Siyaasadda 506 ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

Khiyaanada waxbarashada waxaa ka mid ah “Ka Koobiyaynta AI”, falka gudbinta waxyaabo lagu soo saaray AI (sida ChatGPT) oo uu qofku u gudbiyo sidii shaqo asal ah oo isagu leeyahay iyadoo aan oggolaansho cad laga haysan macalinka.

## Fursadaha Sanad Dugsiyeedka La Dheereeyay

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waxay bixiyaan fursadaha sanad dugsiyeedka la dheereeyay oo ay siiyaan ardayga leh Barnaamij Waxbarasho oo Gaar ah (IEP) haddii kooxda IEP-ga ee ardaygaas ay go'aamiso in adeegyadaasi ay lagama maarmaan u yihiin xilliga fasaxa waxbarashada si loo bixiyo waxbarasho dadweyne oo bilaash ah oo ku habboon. Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan fursadaha sanad dugsiyeedka la dheereeyay ee ardayda leh barnaamijka IEP, si toos ah ula xiriir maamulaha kiiska IEP ee ardaygaaga.

## Safarrada Aqoon Kororsiga

Safarrada aqoon kororsiga ayaa la bixin karaa si loogu kabo waxbarashada ardayda oo ay ardaydu si ikhtiyaari ah uga qaybqaataan oo; haddii sidaas la sameeyo, waxaa laga yaabaa in lacag laga qaado ardayda ka qaybqaadanaysa. Ardayda loogama baahan doono inay bixiyaan kharashka safarrada waxbarashada ee la sameeyo inta lagu jiro maalinta dugsiga, kuwaas oo si toos ah ula xiriira manhajka waxbarashada, isla markaana u baahan ka-qaybgalka ardayga. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Siyaasadda 538 ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Buundooyinka/Buundo-siinta

### Dhaqamada Buundo-siinta/Qiimaynta

Manhajkeena iyo imtixaanadeena waxay ku xiran yihiin heerar. Buundooyinka aanu siino ardayda waxay warbixin u yihiin waxa ardaygu uu bartay, mana aha mid ka turjumaysa habdhaqankooda, u hoggaansanaantooda ama ilaalinta wakhtiga, ama la'aantooda kuwaan. Waxaanu aaminsanahay in ardayda oo dhan ay wax ku baran karaan heerar sare ayna buuxin karaan heerarka, waxaana garowsanahay inay wax ku baran karaan xawaare kala duwan. Buundo-bixinta waxaa loo kala qaybiyaa labo qayb: soo koobid iyo qaabayn.

**Imtixaanaadka Soo Koobidda**
imtixaanaadka Soo Koobidda waxay ardayda siiyaan fursad ay ku caddeeyaan wixi ay soo barteen ama inay "muujiyaan waxa ay yaqaanaan".
Isticmaalka Eberada iyo ku calaamaynta "daahitaan" ee Imtixaanaadka Soo Koobidda:

- Dhammaan Imtixaanaadka Soo Koobidda waa in la isku dayaa.
- Shaqada aan loo gudbin soo koobidda waxaa marka hore la siinayaa "M" oo ah maqan. Tani waxay tilmaamaysaa in aanu hayn caddaynta shaqada.
- Waxaanu isticmaali doonaa wakhti dabacsan si aan ugu qasabno ardayda inay isku dayaan/dhammeystiraan shaqada.
- Shaqada soo koobidda ee aan la gayn siina maqnaata dhammaadka xilliga sixitaanka, eber ma gelino, balse taa beddelkeeda waxaan gelinaa 50% ee dhibcaha suurtagalka ah in laga keeno imtixaankaas.

**Imtixaanaadka Qaabaynta**
Imtixaanaadka Qaabaynta waxay ardayga siiyaan fursado uu ku hagaajiyo waxbarashadiisa waxayna bixiyaan jawaab-celin ku saabsan waaya-aragnimada waxbarasho.

**Meelaha Laga Soo Reebayo**
Ardayda wax loogu habeeyay barnaamijka IEP, Qorshaha 504, ama Taageerada Luuqadaha Badan (ML) ayaa loo oggol yahay dabacsanaan kale oo ku aadan waxyaabaha kor ku xusan.

## Shaqada Guriga

Hawlaha loo diro in lagu sameeyo guriga waxaa diyaariya macalimiinta. Qadarka shaqada guriga waa ay ku kala duwan tahay macalinba-macalin iyo aagga maadada. Degmada dugsiga waxay ka codsanaysaa waalidiinta/mas'uuliyiinta inay ku dhiirrigeliyaan carruurtooda inay u qabtaan shaqada guriga si dhammaystiran oo degdeg ah. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Siyaasadda 610 ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Diidmada Waalidka/Masuulka ee Imtixaanaadka Gobolka oo Dhan ah

Ardayda dugsiga dhexe ee Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waxay ka-qaybqaataan imtixaanaad badan oo gobolka oo dhan ah. Kuwani waxaa ka mid ah: MCA Reading (ardayda fasalka 6aad-8aad), MCA Math (ardayda fasalka 6aad-8aad), MCA Science (ardayda fasalka 8aad), iyo ACCESS (ardayda uqalantay adeegyada Ardayga Barta Luuqadda Ingiriisiga.

Waalidiinta ama masuuliyiinta waxay ardayda ka reebi karaan imtixaanaadkaan iyagoo adeegsanaya foomkan. Fadlan booqo bogga Imtixaanka Ardayga si aad uga hesho macluumaad dheeraad ah ama la xiriir xafiiska dugsigaaga wixi su'aala ah.

## Gudbidda iyo Ku Celinta

Degmada waxaa ka go'an inay ardayda oo dhan ka taageerto gaarista heerarka ku habboon ee koritaanka iyo guusha dhanka waxbarashada. Si guud, ardayda waxaa loo gudbiyaa fasalka xiga kadib marka ay buuxiyaan heerarka tacliinta ee laga filayo; si kastaba ha ahaatee, go'aamada ku saabsan gudbidda, dardargelinta waxbarashada, ama ku celinta fasalka waxaa lagu gaaraa iyadoo la eegayo baahiyaha gaarka ah ee arday kasta dhanka tacliinta, bulshada, iyo shucuurta.

Marka arday uu ka faa'iidaysan karo taageero dheeraad ah ama meeleyn kale, shaqaalaha dugsiga waxay si dhow ugala shaqeeyaan qoysaska in ay dib u eegaan horumarka, uga fikiraan wax ka qabashada la heli karo, ayna go'aamiyaan waddada ugu wanaagsan ee la mari karo. Go'aamada ayaa lagu gaaraa si iskaashi ah, iyadoo laga duulayo talooyinka macallimiinta iyo qoysaska, ayaa lagu hagaa waxa sida ugu wanaagsan u taageeraya guusha muddada-dheer ee ardayga. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Siyaasadda 513 ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Dugsiga Xagaaga iyo Kobcinta Xagaaga

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waxay bixiyaan fursadaha waxbarashada xagaaga si ay u taageeraan koritaanka ardayda, u bixiyaan taageero dheeraad ah, uguna ballaariyaan waxbarashada wax ka baxsan sannad dugsiyeedka. Barnaamijka xagaaga waxaa ku jiri kara fursado wax ka qabasho ah oo loogu talagalay ardayda dhigata dugsiyada hoose ee u baahan taageerada dheeraadka ah, iyo sidoo kale fursado lagu xoojinayo xirfadaha ama lagu dardargelinayo waxbarashada.

Xaaladaha qaarkood, dugsiga xagaaga ayaa laga yaabaa in lagu taliyo ama loo baahdo iyadoo lagu salaynayo baahiyaha tacliinta ee ardayga, waxaana adeegyada si bilaash ah lagu siiyaa ardayda loo aqoonsaday inay u baahan tahay. Si aad uga ogaato wax badan, fadlan booqo Siyaasadda 623 ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

Marka laga soo tago barnaamijka waxbarashada, degmadu waxay bixisaa fursado kobcineed oo badan oo ikhtiyaari ah oo xagaaga ah iyada oo loo marayo Waxbarashada Bulshada. Ardayda dugsiga hoose waxay ka qaybqaadan karaan xerooyinka, xiisadaha, iyo waxqabadyada diiradda lagu saarayo dhinacyada sida farshaxanka, STEM, ciyaaraha, iyo hoggaaminta, iyadoo la bixinayo habab xiiso leh oo lagu sahmiyo xiisaha lana isugu sii xirnaado inta lagu jiro bilaha xagaaga. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan eeg Buug-yaraha Kobcinta Xagaaga.

## Xaqa Waalidku u Leeyahay inuu Ogaado

Haddii waalid uu codsado, degmada dugsiga waxay siin doontaa macluumaad ku aadan aqoonta xirfadeed ee macallimiinta fasalka ee ilmahooda, oo ay ku jiraan, ugu yaraan, waxyaabaha soo socda:

- In macallinku buuxiyay shuruudaha gobolka ee ku saabsan aqoonta iyo shatiga looga baahan yahay heerarka fasallada iyo maadooyinka uu macallinku dhigo;
- In macallinku wax ku barayo xaalad degdeg ah ama ruqsad kale oo ku meelgaar ah taasoo laga dhaafay shuruudihii gobolka ee u-qalmitaanka ama qaadashada shatiga;
- In macallinku uu wax ku barayo takhasuska uu shahaadada ka haysto;
- In ardaygu ay adeegyo siiyaan caawiyeyayaasha xirfadeed iyo, haddii ay sidaasi tahay, aqoontooda.

Intaa waxaa dheer, degmada dugsiga waxay waalidiinta siin doontaa macluumaad ku saabsan heerka guusha uu ilmuhoodu ka gaaray mid kasta oo ka mid ah imtixaannada tacliimeed ee gobolka. Degmada dugsiga waxay waalidiinta ogeysiin doontaa haddii ilmahooda loo qoondeeyay, ama muddo afar toddobaad ah ama ka badan oo isku xiga, uu wax baray macallin aan buuxin shuruudaha shahaadada ama ruqsadda ee gobolku dejiyay ee khuseeya heerka fasalka iyo maadada uu macallinku dhigayo.

# Qaybta 3: Xeerarka iyo Edbinta

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waxaa ka go'an joogtaynta deegaan waxbarasho oo ammaan ah, ixtiraam badan, oo wax soo saar u leh ardayda oo dhan. Habka edbinta degmada waxaa loogu talagalay inuu taageero koritaanka ardayga, baro masuuliyadda, uuna xaqiijiyo in habdhaqanku uusan farogelin waxbarashada.

Habdhaqanka ardayga ee la iska filayo waxaa si cad loogu qeexay buug-gacmeedkan iyo Siyaasadda 506 waxayna khuseeyaan dugsiga, dhulka dugsiga, inta lagu jiro gaadiidka, iyo hawlaha uu dugsigu taabageliyo.

Marka ay arrimo soo kordhaan, shaqaalaha dugsigu waxay kala shaqeeyaan ardayda in ay fahmaan xaaladda waxayna uga jawaabaan qaab caddaalad ah oo joogta. Cawaaqibta waa ay kala duwanaan kartaa iyadoo ay ku xiran tahay darnaanta iyo inta jeer ee uu soo noqnoqdo habdhaqanka waxaana ku jiri kara dhaqamo xal ku soo dabbaalid ah, luminta mudnaanaha, la xiriirka waalidka/masuulka, ama tallaabooyin aad u culus sida cayrin marki loo baahdo. Habdhaqannada daran—gaar ahaan kuwa la xiriira walaacyada dhanka amniga, dhibaataynta, ama carqaladaynta—waxay keeni karaan cawaaqib aad degdeg u ah ama aad u culus.

Degmadu waxa ay sidoo kale xoogga saartaa ka-hortagga iyo taageerada, iyadoo dhiirrigelinaysa habdhaqan wanaagsan, xiriiro adag, iyo wada-shaqeyn u dhaxaysa dugsiga iyo guriga. Ardayda waxaa laga filayaa inay raacaan xeerarka dugsiga, fasalka u dhigtaan si joogta ah, oo ay gacan ka geystaan bulsho dugsi oo wanaagsan, halka qoysaska lagu booriyo inay la shaqeeyaan dugsiyada si wax looga qabto walaacyada iyo taageeridda guusha ardayga.

Qaybtani waxay bixinaysaa tusaalooyin muhiim ah oo ku saabsan habdhaqannada, filashooyinka, iyo jebinada suurtagalka ah ee ku qeexan Siyaasadda 506. Waalidiinta iyo ardayda waxaa laga filayaa inay eegaan dhammaan Siyaasadda 506 ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Soo Xaadiritaanka

Soo xaadiritaanka joogtada ah wuxuu si toos ah ula xiriiraa guusha shaqada tacliinta, waxay ardayda u faa'iidaysaa bulsho ahaan, waxayna abuurtaa fursado ay macallimiinta iyo ardaydu ku yeeshaan wada-xiriiro muhiim ah, iyadoo sidoo kale dhiseysa caadooyinka joogtada ah ee isku-hallaynta. Si aad u hesho xog faahfaahsan, ka eeg 'Faahfaahinta Soo Xaadiritaanka' ee ku jirta Qaybta 1 ee buug-gacmeedka.

## Mamnuucista Xoog Sheegashada

Falka xoog sheegashada, oo ay ku jirto xoog sheegashada intarneedka, waa ka mamnuuc goobaha degmada, hawlaha degmada, ama gaadiidka degmada. Waxaa mamnuuc ah dhaqanka xasidnimada iyo naxariis-darrada ah ee la xiriira isirka, midabka, caqiidada, asalka qarannimo, jinsiga, da'da, xaaladda guurka, xaaladda ku aadan helitaanka kaalmada dadweynaha, naafanimada, diinta, dhibaataynta galmada, iyo rabitaanka jinsi iyo aqoonsiga jinsiga, sida lagu qeexay sharciga. Mamnuucistani waxay khusaysaa ardayda, qandaraaslayaasha madaxa-bannaan, macallimiinta, maamulayaasha, iyo shaqaalaha kale ee degmada.

- "Xoog Sheegasho" micnaheedu waa dhaqan leh cabsi-gelin, hanjabaad, xad-gudub ama waxyeello leh kaas oo si cad u ah mid la dhibsado isla markaana:
    1. isu dheellitirnaan la'aan awoodeed oo dhab ah ama muuqata ay ka dhex jirto ardayga ku hawlan dhaqanka mamnuuca ah iyo bartilmaameedka dhaqanka mamnuuca ah, dhaqankuna soo noqnoqdo ama sameeyo qaab taxane ah; ama

2. si weyn oo la taaban karo u carqaladeeyo awoodda ardaygu u leeyahay inuu wax barto, ama uu uga qaybqaato hawlaha ama barnaamijyada degmada, ama uu helo dheefaha, adeegyada, ama mudnaanaha gaarka ah ee degmada, ama awoodda macallinku u leeyahay inuu ardayda wax ku baro jawi ammaan ah.

Ereyga "xoog sheegasho" waxaa si gaar ah ugu jira xoog sheegashada intarneedka, dhaqanka xasidnimada iyo naxariis-darrada ah, iyo ka faa'iidaysiga galmo.

- “Dhaqanka xasidnimada iyo naxariis-darrada ah” macnihiisu waa abuurista jawi waxbarasho oo cadow ah iyadoo la adeegsanayo ulajeeddo ah in waxyeello la geysto iyadoo si ula kac ah loo dhaawacayo mid kale sabab la'aan ama ku lug yeelashada cadaawad xad dhaaf ah ama farxad ka helidda cadaawadda.

Qof kasta oo aaminsan inuu bartilmaameed ama dhibbane u noqday xoog sheegasho ama qof kasta oo haya xog ama aaminsan jiritaanka fal laga yaabo inuu noqdo xoog sheegasho ama fal kale oo ay mamnuucday Siyaasadda 514, waa inuu falalka la tuhunsan yahay si degdeg ah ugu warbixiyaa sarkaal ku habboon oo ka tirsan degmada kaas oo ay siyaasaddu u xilsaartay arrintan. Qofku wuxuu warbixinta xoog sheegashada u gudbin karaa si qarsoodi ah; hase yeeshee, degmadu kuma tiirsanaan karto oo keliya warbixin aan magac lahayn si ay u go'aamiso tallaabooyin edbin ah ama tallaabooyin kale oo wax looga qabanayo arrinta. Foomka Ka Warbixinta Xoog Sheegashada waa Lifaaqa I ee Siyaasadda 514 waxaana laga heli karaa webseedka bogga Qoysaska. Si aad u hesho xog faahfaahsan, ka eeg Siyaasadda 514 ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Basaska - Dhaqanka Basaska Dugsiga Dushooda iyo Cawaaqibta Ka Dhalan Karta Dhaqan-Xumada

Raacitaanka baska dugsiga waa mudnaan, ma ahan xuquuq. Xeerarka guud ee habdhaqanka ardayga ee degmada dugsiga ayaa lagu dabaqayaa dhammaan ardayda saaran basaska dugsiga, oo ay ku jiraan ardayda dhigata dugsiyada gaarka loo leeyahay iyo kuwa jaatarka. Degmada dugsiga gaadiid ma siin doonto ardayda lagala laabtay mudnaanahooda helitaanka gaadiidka.

Degmada dugsiga waxaa ka go'an waxaa ka go'an inay ardayda u safriso qaab ammaan ah oo habaysan. Si tani loo gaaro, ardayda rakaabka ah waxaa laga filayaa inay raacaan xeerarka degmada dugsiga ee ku saabsan ku sugidda goobta laga raaco baska dugsiga iyo raacitaanka baska dugsiga.

Inta ay sugayaan baska ama kadib marka lagu dejiyo meesha uu istaago bask dugsiga, ardayda oo dhan waa inay u hoggaansamaan xeerarka soo socda:

- Tag meesha uu baska istaago shan daqiiqo kahor wakhtiga laguu qorsheeyay in lagu qaado. Darawalka baska dugsiga ma sugi doono ardayda soo daahda.

- Ixtiraam hantida kuwa kale inta aad baska ku sugayso meesha uu istaago.
- Gacmahaaga, lugahaaga, iyo alaabtaada ha gaarsiin dadka kale oo is-aruuri.
- Adeegso luuqad habboon.
- Ka fogow dhabbaha, waddada, ama jidka weyn markaad baska sugayso.
- Sug ilaa baska uu ka istaago kahor inta aadan aadin baska.
- Kadib marka aad ka dagto baska, ka tag baska.
- Haddii ay tahay inaad goyso wadada, marwalba baska hortiisa wadada ka goo meel uu darawalka kaa arki karo. Darawalka ka sug inuu kuu baaqo kahor inta aadan goynin wadada.
- Lama samayn karo dagaal, dhibaateyn, cabsi-gelin, ama faro-ciyaar.
- Lama isticmaali karo khamro, tubaako, ama daroogo.

Inta la saaran yahay baska, rakaabka oo dhan waa inay u hoggaansamaan xeerarka soo socdo:

- Raac tilmaamaha darawalka wakhti kasta.
- Kursigaaga fadhi adigoo horay ujeeda inta uu basku socdo.
- Si deggan u hadal oo isticmaal luuqad habboon.
- Dhammaan qaybaha jirkaaga ha ku jiraan gudaha baska.
- Gacmahaaga, lugahaaga, iyo alaabtaada ha gaarsiin dadka kale iyo meesha la maro oo is-aruuri.
- Lama samayn karo dagaal, dhibaateyn, cabsi-gelin, ama faro-ciyaar.
- Waxna ha tuurin.
- Lama samayn karo wax ah cunto cunid, biyo cabbid lamana isticmaali karo khamro, tubaako, ama daroogo.
- Hala imaan baska dugsiga wax hub ama khatar ah.
- Waxyeello ha u gaysan baska dugsiga.

Marka aan filashooyinka la buuxin, tallaabooyin cawaaqib ah ayaa la iska qaadi doonaa iyadoo la raacayo xeerarka edbinta ee degmada. Kuwani waxaa ka mid noqon kara digniino, kuraasta oo la qoondeeyo, la xiriirka waalidka/masuulka, ama joojinta mudnaanaha baska. Dhaqan-xumada soo noqnoqota ama daran waxay keeni kartaa ka joojinta baska muddo dheer ama luminta adeegyada gaadiidka. Dib-u-eeg Siyaasadda 506 ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

## Taleefanka Gacanta iyo Aaladaha Kale ee Elektaroonigga ah ee Shakhsiyeed

### Laga Maqan Yahay Maalinta

Isticmaalka Taleefanada Gacanta iyo aaldaha kale ee casriga ah lama oggola inta lagu jiro maalinta dugsiga laga bilaabo saacadda 9:20 a.m.-4:05 p.m. Haddii ay noqoto in arday uu dugsiga la yimaado taleefanka gacanta sababo la xiriira dugsiga ka hor ama kadib, waa in la damiyaa oo lagu hayaa lookada ardayga ama boorsada dhabarka ee ardayga inta lagu jiro maalinta dugsiga. Isticmaalka inta lagu jiro maalinta dugsiga waxay keeni dontaa waxyaabaha soo socda:

- **U Gudbinta 1aad ee Xafiiska** – Aaladda waxaa la hayn doonaa ilaa dhammaadka maalinta dugsiga. Ardayga wuxuu ka qaadan karaa aaladiisa xafiiska guud marka la gaaro dhammaadka maalinta dugsiga.

- **U Gudbinta 2aad ee Xafiiska** – Aaladda waxaa la hayn doonaa ilaa dhammaadka maalinta dugsiga. Waalidka/masuulka waa inuu soo qaadaa aaladda.
- **U Gudbinta 3aad ee Xafiiska** – Aaladda waxaa la hayn doonaa ilaa dhammaadka maalinta. Qorshaha Guusha Ardayga ayaa loo samayn doonaa ardayga, oo uu ku jiri karo kulan lala yeelanayo waalidka/qofka masuulka ka ah ardayga. Waalidka/masuulka waa inuu soo qaadaa aaladda.

**Fiiro Gaar ah:** Raacid la'aanta Qorshaha Guusha Ardayga waxaa ka dhalan doona cawaaqib si waafaqsan Siyaasadda 506 sida hoos timaadda dallada Amar-diidada iyo/ama Habdhaqanka Carqaladda leh/Ixtiraam-darrada.

## Anshaxa

Dhaqan-xumada uu arday ku kaco waxay carqaladayn kartaa geeddi socodka waxbarashada ee arday badan oo kale. Intaa waxaa dheer, ardaydu waa inay bartaan ku dhaqanka caadooyinka wanaagsan ee badbaadada, qiimeeyaan daacadnimada waxbarashada, ixtiraamaan xuquuqda dadka kale, ayna adeecaan sharciga. Si aad u hesho xog faahfaahsan oo ku saabsan Dhaqanka Anshaxa Ardayga iyo cawaaqibta ku xadgudubyada, ka eeg Siyaasadda 506 ee Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Lebiska iyo Muuqaalka

Arday waxaa laga codsan doonaa inay saaraan sheeyaasha qarin kara aqoonsigooda. Waxaan filaynaa ardaydu inay dugsiga ku yimaadaan iyagoo xiran dhar ku habboon. Dharka xayaysiinaya isticmaalka daroogada ama khamrada, ku maadaysanaya dadka kale ama ay ku qoran luuqad aflagaado ah ma aha wax habboon. Lebiska leh luuqad anshax-xumo ah ama sawirro anshax-xumo ah sidoo kale lama oggola. Ardayda xiran lebiska noocaas ah waxaa loo sheegi doonaa inay beddelaan ama ay daboolaan. Sharciga gobolka wuxuu u baahan yahay in kabo lagu xirto dhismaha dadweynaha. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Siyaasadda 506 ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Dugsi iyo Goob Shaqo oo Ka Caagan Daroogada

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waxaa ka go'an joogtaynta deegaan ammaan ah, caafimaad qaba, oo ka caagan daroogada oo ay helaan dhammaan ardayda, shaqaalaha, iyo soo booqdayaasha. Isticmaalka, haysashada, qaybinta, ama ku sakhraansanaanta khamro, walxo kale oo la koontaroolo, ama walxo kale oo lagu sarkhaamo ama waxyeello leh waxay si adag mamnuuc uga yihiin hantida dugsiga, inta lagu jiro maalinta dugsiga, iyo dhammaan hawlaha uu taabageliyo dugsiga. Filashadani waxay khusaysaa ardayda, shaqaalaha, iyo soo booqdayaasha si loo xaqiijiyo deegaan waxbarasho iyo shaqo oo ammaan ah.

Ku xadgudubyada siyaasadan waxay keeni doontaa tallaabo edbin ah si waafaqsan tilmaamaha degmada waxaana ku jiri kara cawaaqib ku lug leh dugsiga iyo/ama laamaha fulinta sharciga. Degmadu waxay sidoo kale xoogga saartaa waxbarashada, ka-hortagga, iyo taageerada si ardayda looga caawiyo inay sameeyaan doorashooyin badbaada ah oo caafimaad qaba. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Siyaasadda 506 ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Mamnuucista Dhibaateynta iyo Rabshadda

Degmada dugsiga waxay ku dadaashaa inay joogtayso deegaan waxbarasho iyo shaqo oo ka caagan dhibaateyn iyo rabshad ku salaysan isir, midab, caqiido, diin, asal qaran, jinsi, aqoonsiga jinsiga, da'da, xaaladda guurka, xaaladda qoyska, xaalad ku aadan qaadashada kaalmada dadweynaha, rabitaanka jinsi, ama naafanimada. Degmada dugsiga waxay mamnuucday nooc kasta oo ah dhibaateyn ama rabshad ku salaysan isir, midab, caqiido, diin, asal qaran, jinsi, aqoonsiga jinsiga, da'da, xaaladda guurka, xaaladda qoyska, xaalad ku aadan qaadashada kaalmada dadweynaha, rabitaanka jinsi, ama naafanimada. Xog faahfaahsan oo ku saabsan siyaasadda degmada dugsiga ee "Mamnuucista Dhibaateynta iyo Rabshadda" ayaa ku jirta Siyaasadda 413 ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada. Foomka Ka Warbixinta Takoorka, Dhibaateynta, iyo Rabshadda waxaa laga heli karaa bogga webseedka Qoysaska.

## Mamnuucista Dullaysiga

Dullaysi waxaa lagu qeexaa fal ka dhan ah arday, ama ku qasbidda arday inuu sameeyo fal, kaas oo keenaya khatar weyn oo waxyeello u geysan karta qofka, iyadoo ujeeddadu tahay in ardayga lagu daro ama uu xubin ka noqdo urur arday, ama ujeedadi kasta ee kale. Ma jiro arday ama qof shaqaale ah oo qorsheyn kara, amri kara, dhiirrigelin kara, caawin kara, ama ka qaybqaadan kara dullaysi. Siyaasadan ka dhanka ah dullaysiga waxay khusaysaa dhaqanka ka dhaca gudaha ama dibadda hantida degmada iyo wakhti kasta oo ka mid ah maalinta. Qof kasta oo aaminsan inuu bartilmaameed ama dhibbane u noqday dullaysi ama qof kasta oo haya xog ama aaminsan jiritaanka fal laga yaabo inuu noqdo dullaysi, waa inuu falalka la tuhunsan yahay si degdeg ah ugu warbixiyaa sarkaal ku habboon oo ka tirsan degmada kaas oo ay Siyaasadda 526 u xilsaartay arrintan. Qofku wuxuu warbixinta dullaysiga u gudbin karaa si qarsoodi ah; hase yeeshee, degmadu kuma tiirsanaan karto oo keliya warbixin aan magac lahayn si ay u go'aamiso tallaabooyin edbin ah ama tallaabooyin kale oo wax looga qabanayo arrinta. Xog faahfaahsan oo ku saabsan siyaasadda degmada dugsiga ee "Mamnuucista Dhibaateynta iyo Rabshadda" ayaa ku jirta Siyaasadda 526 ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada. Foomka Ka Warbixinta Dullaysiga waa Lifaaqa I ee Siyaasadda 526 waxaana laga heli karaa webseedka bogga Qoysaska.

## Adeegsiga La Oggol Yahay ee Intarneedka

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waxay ardayda marin u siiyaan kheyraadka tignoolajiyadda— oo ay ku jiraan aaladaha, shabakadaha, iyo qalabka onlaynka—si loo taageero waxbarashada, wada-xiriirka, iyo wada-shaqeynta. Kheyraadkani waxaa loo isticmaalayaa ujeedooyin waxbarasho oo kaliya, oo dhammaan isticmaalka waa in la waafajiyaa filashooyinka dugsiga iyo siyaasadaha degmada. Isticmaalka aan habboonayn, sida ku galitaanka ama wadaagista wax khatar ah ama aan habboonayn, carqaladaynta nidaamyada, si khaldan u isticmaalka akoonada, ama jebinta shuruucda, waxay keeni kartaa luminta marin u helidda tiknoolajiyada, edbin uu sameeyo dugsiga, iyo/ama cawaaqib sharci. Qoysaska iyo ardayda waxaa looga baahan yahay inay sannad kasta dib u eegaan oo ay ogolaadaan shuruudaha isticmaalka la aqbali karo, si loo xaqiijiyo isticmaalka badbaadada iyo mas'uuliyadda leh ee tignoolajiyadda. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Siyaasadda 524 ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Lookooyinka

Ardayda ayaa masuul ka ah ammaanka alaabtooda. Ardayda oo dhan waxay lahaan doonaan looko loo qoondeeyay waana inay lookooyinkaan ku isticmaalaan kaliya qufullo uu gado dugsiga. Marka aad soo iibsato quful, waxaad dib u isticmaali kartaa sanad ilaa sanadka xiga. Lambarada sirta meel ku qoro si aad ugu ilaashato. Ardaydu waa inay u xirnaadaan lookooyinkooda wakhti kasta (oo ay ku jiraan lookooyinka PE, haddii ay isticmaalaan) oo ay qarsadaan lambaro sireedkooda. Lookooyinka WAA IN AAN LA WADAAGIN ardayduna waxay kaliya isticmaali kartaa lookooyinka la siiyay. Marwalba waxyaabaha qiimaha badan iyo dharka ku xiro lookadaada. Dugsigu masuul kama ahan alaabtaada. Dugsiga wuxuu xaq u leeyahay inuu baaro waxa ku jira lookada si uu uga saaro wax kasta oo lid ku ah xeerarka dugsiga ama wax kasta oo loo arko inay wax u dhimayaan dugsiga ama dadka jooga. Dhibaatootinka qufulada ama lookooyinka u sheeg shaqaalaha xafiiska. Haddii arday uu doorto inuusan isticmaalin lookada la siiyay, taasi waa caadi, balse lookada weli waa masuuliyadiisa marka waa inay u xirnaataa si qofkale uusan marin ugu helin.

## Isticmaalka Tignoolajiyadda

Isticmaalka aalad kasta oo dhijitaal ah oo lagu isticmaalo Shabakadda Degmada waxay u baahan tahay ardaydu inay raacaan Siyaasadda Adeegsiga La Oggol Yahay ee Siyaasadda 524 ee Guddiga Dugsiyada Edina. Qaar ka mid ah si khaldan u isticmaalka kombiyuutarka waxaa ka mid ah gelitaanka baraha intarneedka ee aan habboonayn, wadaagista lambar sireedyada, ku kaydsiga barnaamijyada (geemamka), wasakhaynta nidaamka, iyo ku xadgudbidda shuruucda xuquuqda lahaanshaha. Ka joojinta mudnaanaha isticmaalka tignoolajiyadda iyo/ama ka joojinta dugsiga ayaa ay ka dhalan kartaa ku xadgudubka tignoolajiyadda.

## Dugsiyo Ka Caagan Tubaakada

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waxaa ka go'an joogtaynta deegaan caafimaad qaba, badbaado ah, oo ka caagan tubaakada oo ay helaan dhammaan ardayda, shaqaalaha, iyo soo booqdayaasha. Isticmaalka ama haysashada badeecadaha tubaakada, aaladaha la xiriira tubaakada, ama aaladaha elektaroonigga ah ee lagu isticmaalo (oo ay ku jiraan alaabada la nuugo) waa ka mamnuuc dhammaan hantida dugsiga, baabuurta dugsiga dhexdooda, iyo dhammaan dhacdooyinka uu taabageliyo dugsiga, ha ahaato gudaha ama dibedda dugsiga. Filashadani waxay khusaysaa ardayda, shaqaalaha, iyo soo booqdayaasha.

Ardayda jebisa siyaasadan waxaa laga qaadayaa tallaabo edbin ah, degmaduna waxay sidoo kale xoogga saartaa waxbarashada iyo ka-hortagga, oo ay ku jiro barista khataraha ay leeyihiin nuugista iyo isticmaalka tubaakada. Yoolku wuxuu yahay in kor loo qaado caafimaadka iyo ladnaanta ardayga iyadoo isla markaana la xaqiijinayo deegaan waxbarasho oo badbaado ah. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Siyaasadda 419 ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Kharribaadda/Waxyeellaynta Hantida

Ardayda waxaa laga filayaa inay ixtiraamaan oo ay ka taxadaraan hantida dugsiga, iyo sidoo kale hantida dadka kale. Kharribaadda—oo ay ku jiraan, balse aanay ku koobnayn, suuro-xumaynta ama burburinta tas-hiilaadka dugsiga, qalabka, ama alaabaha shakhsiyeed—waxay wax u dhimaysaa deegaan waxbarasho oo badbaado ah oo ixtiraam badan. Arday kasta oo lagu helo inuu masuul ka yahay kharribaadda waxaa looga baahan karaa inuu gudo ama beddelo hantida waxyeellowday wuxuuna wejihi karaa cawaaqib edbin ah iyadoo la raacayo tilmaamaha degmada. Dhacdooyinka soo noqnoqda ama daran waxay keeni karaan cawaaqib dugsiga ku salaysan oo dheeraad ah iyo/ama u gudbinta laamaha fulinta sharciga. Ilaalinta goobaha aan wadaagno waa masuuliyad wadajir ah, waxaana ardayda laga filayaa inay ku faanaan inay ka dhigaan kuwo nadiif ah, badbaado ah, oo soo dhaweeya dadka oo dhan. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Siyaasadda 506 ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Mamnuucista Hubka

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waxaa ka go'an joogtaynta deegaan waxbarasho oo ammaan ah, iyadoona haysashada, isticmaalka, ama qaybinta hubka ama waxyaabaha hubka u eg ay si adag mamnuuc uga yihiin dhulka dugsiga iyo dhammaan hawlaha la xiriira. Tani waxaa ka mid ah sheeyaasha loogu talagalay inay gaystaan waxyeello iyo sidoo kale sheeyaasha loo isticmaalo qaab khatargelin kara badbaadada. Siyaasadani waxay khusaysaa dhismayaasha dugsiga, dhulalka dugsiga, basaska dushooda, meelaha uu istaago baska, iyo inta lagu jiro dhammaan dhacdooyinka uu taabageliyo dugsiga.

Ku xadgudub kasta oo ku aadan siyaasadan waxay keeni doontaa tallaabo edbin ah oo daran, oo ay ku jiri karto hakin, ruqsayn, iyo/ama ku lug yeelashada sharci fulinta, iyadoo ay ku xiran tahay xaaladda. Ardayda si aan ula kac ahayn dugsiga u keena shey mamnuuc ah waxaa laga filayaa inay isla markiiba u sheegaan xubin ka mid ah shaqaalaha ama maamulaha. Degmada waxay si dhab ah u qaadataa dhammaan walaacyada waxayna uga jawaabtaa si degdeg ah si loo xaqiijiyo badbaadada ardayda, shaqaalaha, iyo bulshada ballaaran ee dugsiga. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo Siyaasadda 501 ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

# Qaybta 4: Caafimaadka iyo Badbaadada

## Shilalka

Dhammaan dhaawacyada ardayda ee ka dhaca dugsiga, hawlaha uu taabageliyo dugsiga, ama gaadiidka dugsiga dushooda waa in loo sheegaa qofka qaangaarka ah ee kormeeraya iyo kalkaaliyaha dugsiga marki ay khusayso. Waalidiinta/masuuliyiinta ardayga dhaawaca ah waxaa loo sheegi doonaa sida ugu dhakhsiyaha badan. Haddii ardaygu u baahdo daryeel caafimaad oo degdeg ah, maamulaha ama madaxa kale ee degmada ayaa wici doona 911 ama raadin doona daaweyn caafimaad oo degdeg ah kadibna la xiriiri doona waalidka(waalidiinta).

## Qorshaha Maareynta Asbestos-ka

Degmada dugsigu waxay soo saartay qorshe lagu maareeyo asbestos-ka. Nuqul ka mid ah qorshahan waxaa laga heli karaa bogga webseedka Caafimaadka iyo Badbaadada ee Dugsiyada Dadweynaha ee Edina.

## Maareynta Xasaradda

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina ayaa dejiyay qorshayaasha Maareynta Xasaradda. Dhisme kasta oo dugsi wuxuu leeyahay qorshe maareynta xasaradda ah oo u gaar ah dhismaha. Ardayda iyo waalidiinta waxaa la siin doonaa xogta qorshayaasha u gaarka ah degmada iyo dugsiga.

Qorshayaasha Maareynta Xasaradda waxay wax ka qabtaan xaalado xasarad ah oo kala duwan oo ku imaan kara degmada dugsiga. Degmada dugsiga waxay diyaarisay habraacyada guud ee lagu wajaho xasaradda oo ku aadan sugidda amniga dhismayaasha, daadgureynta fasalka, daadgureynta dugsiga, gabbaadka, iyo habraacyada wada-xiriirka. Degmada dugsiga waxay samayn doontaa dhoollatusyada albaabo xirashada, dhoollatusyada dabka, dhoollatuska duufaanta sanad dugsiyeedka oo dhan. Si aad waxbadan uga ogaato qorsheynta maareynta xasaradda degmada, booqo boggeena webseedka Badbaadada iyo Amniga oo soo eeg Siyaasadda 806 ee ku jirta Buuggeena Siyaasadda Degmada.

## Xogta Xiriirka Xaaladaha Degdegga ah

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waxay adeegsadaan xogta xiriirka ee lagu bixiyay Infinite Campus si ay u aqoonsadaan meelaha lagala xiriirayo xaaladaha degdegga ah ee arday kasta. Xogtani waxay hagtaa cidda lala xiriirayo xaaladaha degdegga ah iyo kuwa aan degdegga ahayn labadaba, oo ay ku jiraan jirrada, isbeddelada jadwalka, ama ogeysiisyada dugsiga ee degdegga ah. Waa muhiim in daryeelayaasha ay xaqiijiyaan in dhammaan xogta xiriirka ay tahay mid sax ah isla markaana kala-horreynta liisku ay muujinayso cidda ay tahay in marka hore lala xiriiro. Daryeelayaasha waxay dib u eegi karaan oo ay cusboonaysiin karaan macluumaadkan wakhti kasta iyagoo galaya bogga waalidka oo adeegsanaya Infinite Campus. Wixi caawimo ah, qoysaska waxaa lagu boorinayaa inay la xiriiraan xafiiska guud ee dugsigooda.

## Macluumaadka Caafimaadka

### Gargaarka Koowaad

Xafiiska kalkaaliyaha caafimaadka ee dhisme kasta waxaa loo qalabeeyay inuu maareeyo dhaawacyada fudud ee u baahanaya gargaarka koowaad. Haddii xafiiska kalkaaliyaha caafimaadka uusan furnayn, waxaa caawimo laga raadsan karaa xafiiska maamulka dhismaha. Haddii arday uu xaalad degdeg ah oo caafimaad oo aad u daran uu ku dareemo dugsiga, waxaa la wici doonaa 911 iyo/ama waxaa lala xiriiri doonaa waalidka/qofka masuulka ka ah iyadoo ku xiran xaaladda. Degmadu waxay sidoo kale rakibtay qalabka otomaatiga ah ee dib-u-kicinta wadnaha ee dibedda ah (AED-yada). Faragelinta qalab kasta oo AED ah waa mamnuuc waxaana ka dhalan kara tallaabo edbin ah.

### Cudurada La isu Gudbiyo

Si ardayda kale looga ilaaliyo jirrooyinka faafa, ardayda qaba cudurro gaar ah looma oggola inay dugsiga yimaadaan inta ay faafin karaan.

Haddii waalid ama qof masuul ah uu ka shakiyo in canugooda uu qabo cudur la isu gudbin karo ama faafa, waalidka ama qofka masuulka ka ah waa inuu la xiriiraa kalkaaliyaha caafimaadka ee dugsiga ama maamulaha si loogu digo ardayda kale ee laga yaabo in la gaarsiiyay cudurka.

Ardayda qabta cudurada la isu gudbiyo qaarkood lagama saari doono inay dugsiga u dhigtaan sida caadiga ah ee ay maalinlaha u soo xaadiraan goobaha tan iyo inta caafimaadkooda uu u saamaxayo isla markaana soo xaadiritaankoodu uusaan keenaynin khatar weyn oo ku aadan in jirrada loo gudbiyo ardayda kale ama shaqaalaha degmada dugsiga. Degmada dugsiga waxay go'aamin doontaa iyadoo xaalad kasta gaarkeeda u eegaysa in soo xaadiritaanka arday faafin kara cudur uu keenayo khatar weyn oo ah in cudurka loo gudbiyo dadka kale.

## Adeegyada Caafimaadka

Xafiiska caafimaadka ardayda waxaa jooga Kalkaaliye Dugsi oo Shati-haysta (LSN) oo tababaran. Ardayda ku jirrata dugsiga waa inay booqdaan kalkaaliyaha caafimaadka wixi taageero ah. Kalkaaliyaha LSN wuxuu u qabanqaabin doonaa ardayda ku jirrata dugsiga inay goorhore aadaan guriga. Marka ay dhacdo xaalad degdeg ah, kalkaaliyaheena LSN ama shaqaale kale oo loo xilsaaray ayaa dhaqangelin doona habraacyadeenna ka jawaabista xaaladaha degdegga ah. Waalidka/qofka masuulka ka ah ardayga waa inuu ugu horrayn la socodsiiyaa xafiiska soo xaadiritaanka haddii canugiisa uusan imaan karin dugsiga jirro darteed. Waxay sidoo kale la socodsiin karaan kalkaaliyaha caafimaadka ee dugsiga haddii loo baahdo. Si aad waxbadan uga ogaato adeegga caafimaadka fadlan booqo bogga EPS ee Caafimaadka iyo Fayo-qabka.

## Tallaalada

Ardayda oo dhan waa inay bixiyaan caddeyn tallaal ama ay soo gudbiyaan dukumiintiyo ku habboon oo ka dhaafaya tallaalladaas si ay isaga diiwaangeliyaan ama ay ugu sii jiraan diiwaangelintooda. Ardayda ayaa laga dhaafi karaa shuruudda tallaalka marka tallaalka ardayga aan la samayn karin sababo caafimaad dartood; marka ay jirto xaqiijin sheybaar oo muujinaysa inuu jiro difaac ku filan; ama sababo la xiriira caqiidooyin ay si dhab ah u aaminsan yihiin waalidiinta/mas'uuliyiinta ama ardayga. Degmada dugsiga waxay hayn doontaa fayl ay ku jiraan diiwaanada tallaalka ee arday kasta oo dhigta degmada dugsiga ugu yaraan shan sano kadib marka ardaygu gaaro da'da 18 sano jir. Si aad u hesho nuqul ka mid ah jadwalka tallaalka ama u hesho foomka ka dhaafista ama xog booqo boggeena EPS ee Caafimaadka iyo Fayo-qabka AMA la xiriir xafiiska caafimaadka ee dugsigaaga.

## Daawooyinka inta Lagu Jiro Maalinta Dugsiga

EPS waxay garowsan tahay in ardayda qaar ay u baahan karaan daawooyin loo qoray ama daawooyinka inta lagu jiro maalinta dugsiga. Dugsiga in lagu siiyo daawo loo qoray ama daawooyin waxay u baahan tahay codsi saxiixan oo dhammeystiran oo ka socda waalidka ardayga. Foomka “Siinta Daawooyinka Loo Qoray” waa in la dhammeystiraa halmar sanadki iyo/ama marka uu isbeddel ku yimaado daawada dhakhtarku qoro ama shuruudaha sida loo siinayo. Daawooyinka dhakhtarku qoro waa in dugsiga lagu keenaa weelkoodi asalka ahaa ee uu farmashiiluhu ku qoray magaca ardayga, waana in loo siiyaa qaab waafaqsan tilmaamaha ku qoran.

Daawooyinka uu dhakhtarku qoro ma aha inuu ardaygu sito, balse waxaa looga tagayaa shaqaalaha dugsiga ee ku habboon. Meelaha laga soo reebayo ee la oggol yahay waxaa ka mid ah: daawooyinka la isu qoray ee xanuunka neefta ee lagu qaato qalabka sanka laga jiido si waafaqsan siyaasadda iyo habraacyada degmada dugsiga, daawooyinka loo bixiyo sida lagu xusay heshiis qoraal ah oo u dhexeeya degmada dugsiga iyo waalidka ama sida lagu qeexay Barnaamijka Waxbarashada ee Gaarka ah (IEP), qorshe lagu diyaariyey Qaybta 504 ee Xeerka Dib-u-habeynta (Qorshaha Qaybta 504), ama qorshe caafimaad oo gaar ah (IHP). Marijuwaana lagama oggola hantida dugsiga xitaa haddii uu dhakhtar qoray. Degmada dugsiga waa in la ogeysiiyaa isbeddel kasta oo ku yimaada daawada dhakhtarku qoro ee ardayga. Si aad waxbadan uga ogaato Daawooyinka inta Lagu Jiro Maalinta Dugsiga booqo boggeena EPS ee Caafimaadka iyo Fayo-qabka ama la xiriir xafiiska caafimaadka ee dugsigaaga.

## Macdanta Rasaasta (Lead) ee Ku Jirta Biyaha La Cabbo ee Dugsiga

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waxay taariikh ahaan soo samayn jireen, ayna sii wadaan inay sameeyaan, tijaabinta Macdanta Rasaasta (Lead) ee Ku Jirta Biyaha La Cabbo sida lagu tilmaamay talooyinka Waaxda Caafimaadka ee Minnesota ee “Yaraynta Macdanta Rasaasta (Lead) Ku Jirta Biyaha La Cabbo: Hagis Farsamo oo loogu talagalay Dugsiyada Minnesota” iyo shuruudaha Xeerka Minnesota 121A.335. Qofkasta oo danaynaya in lagala hadlo barnaamijka ama natiijooyinka Macdanta Rasaasta (Lead) ee Ku Jirta Biyaha La Cabbo ee degmada wuxuu la xiriiri karaa Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee degmada si uu u helo dukumiintiyada. Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa boggeena Caafimaadka iyo Badbaadada.

## Ogeysiiska Adeegsiga Sunta Cayayaanka

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waxay adeegsadaan shirkad qaabilsan adeegga xakamaynta cayayaanka oo shati haysata isla markaana xirfad u leh si looga hortago loona xakameeyo jiirka, cayayaanka, iyo noocyada kale ee dhibaatada geysta, kuwaas oo laga fulinayo gudaha iyo hareeraha dhismayaasha degmada. Barnaamijkooda wuxuu ka kooban yahay:

- Kormeerka iyo la socodka si loo go'aamiyo inay cayayaano jiraan iyo in wax daawo ah loo baahan yahay;
- Talooyinka dayactirka iyo nadaafadda si loo ciribtiro cayayaanka iyadoo aan loo baahan kiimikooyinka cayayaanka lagu dilo;
- Adeegsiga tallaabooyinka aan kiimikada ahayn sida dabinada, xiridda daldaloolada, iyo baarista; iyo
- Adeegsiga waxyaabaha lagu xakameeyo cayayaanka ee ka diiwaangashan hay'adda EPA marki loo baahdo.

Saameynta caafimaad ee muddada dheer ah ee ay ku leeyihiin carruurta ee ka soo gaaraysa adeegsiga waxyaabaha lagu xakameeyo cayayaanka si buuxda looma fahmi karo. Dhammaan waxyaabaha lagu xakameeyo cayayaanka waxaa loo doortaa laguna isticmaalaa si waafaqsan tilmaamaha ku qoran sida uu dhigayo sharciga federaalku.

Qiyaasta jadwalka kormeerada xakamaynta cayayaanka iyo daaweynta suurtagalka ah ee cawska ayaa loo heli karaa dib-u-eegis.

Waalidiinta ardayda waxay gudbin karaan codsi ay ku helayaan ogeysiin hore oo ku aadan isticmaal kasta iyagoo wacaya maamulaha dugsiga ama Waaxda Dhismayaasha iyo Dhulalka lambarka (952) 848-3999.

Xaashiyaha Xogta Badbaadada ee dhammaan sunta cayayaanka iyo dhirta ee la adeegsado waxaa dib-u-eegistooda laga heli karaa iyadoo la wacayo Waaxda Dhismayaasha iyo Dhulalka. Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa boggeena Caafimaadka iyo Badbaadada.

## Macluumaadka Ka-hortagga is-dilka

Ardayda iyo qoysasku waxay heli karaan caawimo wakhti kasta. Wac ama qoraal u dir 988 si aad ula xiriirto Khadka Caawimada Ka-hortagga is-dilka & Xasaradda ee 988. Si aad ula xiriirto Khadka Qoraalka ah ee Xasaradda, qoraalka HOME u dir 741741. Gudaha Hennepin County, adeegyada xasaradda ee guurguura ee maxalliga ah ayaa la heli karaa 24 saac maalinti lambarka (612) 596-1223. Haddii ay jirto xaalad degdeg ah oo ku aadan badbaadada, wac 911.

## Soo Booqdayaasha

Waalidiinta/masuuliyiinta iyo xubnaha bulshada waa lagu soo dhaweynayaa inay soo booqdaan dugsiyada. Si loo xaqiijiyo badbaadada kuwa ku jira dugsiga loogana fogaado carqalad ku timaada deegaanka waxbarashada, dhammaan dadka soo booqanaya dhismaha waa inay si toos ah u tagaan xafiiska guud marka ay soo galaan dhismaha, marka laga reebo munaasabadaha u furan dadweynaha. Dhammaan dadka soo booqanaya waxaa looga baahan doonaa inay bixiyaan aqoonsi sax ah, inay iska diiwaangeliyaan xafiiska guud oo ay xirtaan “baajajka soo booqdayaasha” inta ay ku dhex jiraan dhismaha maalinta dugsiga. Dadka soo booqanaya waa inay haystaan oggolaanshaha maamulaha kahor inta aysan booqan fasal inta lagu jiro wakhtiga wax loo dhigayo. Shakhsi ama koox ayaa loo diidi karaa oggolaansho lagu booqdo dugsi ama hantida dugsiga, ama oggolaanshaha noocaas ah ayaa lala laaban karaa, haddii qofka soo booqanaya uusan u hoggaansamin habraacyada degmada dugsiga ama haddii booqashadu aysan dan ugu jirin ardayda, shaqaalaha, ama degmada dugsiga. Ardayda looma oggola inay soo booqdayaal keenaan dugsiga iyagoo aan oggolaansho hore ka haysan maamulaha.

# Qaybta 5: Buugga Siyaasadda Degmada (Tusmada Mowduucyada La Xushay)

| **Mowduuca** | **Lambarka(Lambarada) Siyaasadda** |
|---|---|
| Shilalka | 806 |
| Fursadaha Waxbarashada Beddelka Kale ah | 605 |
| Soo Xaadiritaanka | 503 |
| Xoog Sheegashada La Mamnuucay | 514 |
| Taleefanka Gacanta | 506, 524 |
| Hawlaha Fasalka | 619 |
| Cabashooyinka | 104 |

| | |
|---|---|
| Maareynta Xasaradda | 806 |
| Anshaxa | 506 |
| Dugsi iyo Goob Shaqo oo Ka Caagan Daroogada | 418 |
| Xogta Xiriirka Xaaladaha Degdegga ah | 515 |
| Liiska Shaqaalaha | 406 |
| Hubinada Sooyaalka Taariikhda Shaqada | 404 |
| Helitaanka Loo Siman Yahay ee Tas-hiilaadka Dugsiga | 801 |
| Sanad Dugsiyeedka La Dheereeyay | 508 |
| Safarrada Aqoon Kororsiga | 538 |
| Ururinta Lacagaha | 629, 709 |
| Hadiyadaha Shaqaalaha | 421 |
| Dhibaateynta iyo Rabshadda La Mamnuucay | 413 |
| Dullaysiga La Mamnuucay | 526 |
| Macluumaadka Caafimaadka | 516, 516.5, 518, 530 |
| Shaqada Guriga | 610 |
| Adeegsiga La Oggol Yahay ee Intarneedka | 524 |
| Wareysiyada Ardayda ee ay Sameynayaan Hay'ado Dibedda ah | 519 |
| Takoor La'aanta | 103, 401, 402, 521, 522, 528 |
| Ogeysiinta Ardayda Rabshadda Badan | 529 |
| Ballan-qaadka Daacadnimada | 531 |
| Jadwalka | 602 |
| Hawlaha Dugsiga | 627, 628 |
| Habraacyada Xiritaanka Dugsiga | 807 |
| Kalandarka Dugsiga | 602 |
| Baaritaanada | 502, 527 |
| Lebiska iyo Muuqaalka Ardayga | 504 |
| Siyaasadda Cuntada Dugsiga | 533 |

| | |
|---|---|
| Gudbidda iyo Ku Celinta Dugsiga | 513 |
| Daabacaadaha iyo Agabka Ardayga | 512 |
| Diiwaanada Ardayga | 515 |
| Ra'yi Ururinada Ardayga | 520 |
| Dugsiga Xagaaga | 623 |
| Dugsiyo Ka Caagan Tubaakada | 419 |
| Gaadiidka Ardayda Dugsiyada Dadweynaha | 713 |
| Kharribaadda | 506 |
| Fiidiyowga iyo La Socodka Elektaroonigga ah | 717 |
| Soo Booqdayaasha Dhismayaasha Degmada Dugsiga | 903 |
| Hubka La Mamnuucay | 501 |